

Ogeysiiska Ilaalinta/Dhawrista Habraaca: Xuquuqda Waalidiinta Ardayda Naafada Qabaan



Taariikhda Dhaqangalka: Oktoobar 19, 2022

Ilaha

Maamulaha Waxbarashada Gaarka ah ee Dugsiga Degmadaada

Waxay hayaan macluumaadka ku saabsan xuquuqdaada iyo adeegyada waxbarashada gaarka ah ee bulshadaada. La xidhiidh xafiiska kormeerahaaga si aad u ogaato magaca iyo lambarka taleefoonka ee qofkan.

Gobolka Vermont: Wakaalada Waxbarashada

Dukumeentiga [Xuquuqda Waalidiinta Ardayda Naafada Qabaan](#) waxa uu bixinayaa macluumaadka ku saabsan dhexdhexaadinta, nidaamka cadaaladeed ama cabashada ku aadan maamulka, iyo maadooyinka kale ee khuseeya xuquuqda waalidiinta ardayda naafada qabaan. Intaa waxaa dheer, macluumaadka xidhiidhka ayaa laga dhex heli karaa dukumeentigan haddii aad wax su'aalo ah ama walaacyo ah qabtid.

Foomamka

- [Foomka dhexdhexaadinta](#)
- Cabashada nidaamka cadaaladeed: [loogu talagalay waalidiinta](#)
- Cabashada nidaamka cadaaladeed: [loogu talagalay dugsiyada degmooyinka](#)
- [Foomka cabashada ka dhanka ah maamulka](#)

Ciwaanka iimaylka ee la adeegsanayo marka foomamka loo buuxinayo si elektaroonig ah: AOE.MediationDPinfo@vermont.gov

Cinwaanka boostada ee la adeegsanayo marka foomamka loo buuxinayo si boosto ahaan:

Wakaalada Waxbarashada

Adeegga Dhexdhexaadinta ee Waxbarashada Gaarka ah

1 National Life Drive, Davis 5

Montpelier, VT 05620-2501

Ilaha/Macluumaadka kale ee gobolka

[Shabakada Qoyska ee Vermont](#)

600 Blair Park, Rd Ste. 240

Williston, Vermont 05495

Taleefonka: (802) 876-5315

[Mashruuca Sharciga Naafada ee Vermont](#)

264 North Winooski Avenue

Burlington, VT 05401

Taleefonka: (800) 889-2047

Tusmooyinka

Ilaha.....	2
Maamulaha Waxbarashada Gaarka ah ee Dugsiga Degmadaada.....	2
Gobolka Vermont: Wakaalada Waxbarashada.....	2
Foomamka.....	2
Ilaha/Macluumaadka kale ee gobolka	2
Ogeysiiska Ilaalinta/Dhawrista Habraaca: Xuquuqda Waalidiinta Ardayda Naafada Qabaan	8
Talooyinka Waalidka ee Xeerarka Waxbarashada Gaarka ah ee Vermont	8
Fikrad Bixinta Waalidka ee ku aadan Nuxurka IEP-ga.....	9
Macluumaadka guud	10
Ogeysiiska Horay Loo Qoray	10
Ogeysiis	10
Nuxurka ogeysiiska	10
Ogaysiis ku qoran luqad la fahmi karo.....	11
Afka Hooyo.....	11
Iimaylka.....	11
Oggolaanshaha Waalidka - Qeexida	11
Oggolaanshaha Waalidka	12
Oggolaanshaha Qiimeynta Hore	12
Xeerarka gaarka ah ee loogu talagalay qiimaynta hore ee waadhadhka Gobolka.....	12
Oggolaanshaha waalidka ee ku aadan adeegyada	13
Ka noqoshada oggolaanshaha waalidka ee ku aadan adeegyada	13
Oggolaanshaha waalidka ee ku aadan dib u qiimeynada	14
Dukumeentiyeeynta dadaalada macquulka ah ee lagu helaayo oggolaanshaha waalidka	14
Shuruudaha oggolaanshaha ee kale.....	14
Qiimeynta Waxbarasheed Madaxa-banaan	15
Guud ahaan.....	15
Qeexitaannada.....	15
Xaqa waalidku u leeyahay qiimaynta iyadoo la isticmaalayo khrashka dawlada.....	15
Qiimeynada Ay Waalidiintu-bilaabeen	16
Codsiyada ku aadan qiimeynta ee saraakiisha dacwada dhegeysanayaan	16
Shuruudaha dugsiga degmada / ururka kormeerka	16

Sir ahaanshaha Macluumaadka	16
Qeexitaannada.....	16
Shakhsi ahaan Lagu aqoonsan karo	17
Ogeysiiska ku socda Waalidiinta.....	17
Xuquuqda Helitaanka	17
Diiwaanka Helitaanka.....	18
Diiwaanada in Ka Badan Hal Ilmo.....	18
Liiska Noocyada iyo Goobaha Macluumaadka.....	18
Khidmadaha	18
Wax ka Beddelka Diiwaanada iyadoo ah Codsiga Waalidiinta.....	19
Fursada Dacwad Dhagaysiga.....	19
Habraacyada Dacwad Dhageysiga.....	19
Natiijada Dacwad Dhageysiga.....	19
Oggolaanshaha Ku aadan Shaacinta Macluumaadka Shakhsi ahaan La Aqoonsan Karo.....	20
Dhawritaanada.....	20
Burburinta Xogta.....	20
Habraacyada Cabashada ee Vermont	21
Farqiga U dhaxeya Cabashada Dacwad Dhegeysiga Nidaam Cadaaladeedka iyo Habraacyada Cabashada Maamuleed	21
Habraacyada Cabashada Ka dhanka ah Maamulka	21
Guud ahaan.....	21
Wakhti kordhinada.....	22
Cabashooyinka ka dhanka ah maamulka iyo dacwad dhageysiga nidaam cadaaladeedka	22
Xareynta Cabasho ka dhan ah Maamulka.....	22
Guud ahaan.....	23
Qeybta C cabashooyinka.....	23
Habraacyada Cabashada Nidaam Cadaaladeedka.....	23
Xareynta Cabashada Nidaam Cadaaladeedka	23
Guud ahaan.....	23
Macluumaadka loogu talagaly waalidiinta.....	24
Cabashada Nidaam Cadaaladeedka	24
Guud ahaan.....	24

Nuxurka cabashada	24
Ogeysiiska loogu baahan yahay ka hor dacwad dhageysiga cabashada nidaam cadaaladeedka	24
Filnaanshaha cabashada.....	25
Wax ka beddelka cabashada.....	25
Jawaab-celinta dugsiga degmada ama ururka kormeerka ee ku aadan cabashada nidaam cadaaladeedka	25
Jawaab-celinta qolada kale ee ku aadan cabashada nidaam cadaaladeedka	26
Foomamka Moodada.....	26
Dhexdhaxaadinta	26
Guud ahaan.....	26
Waxyaabaha loo baahan yahay.....	26
Eex la'aanta dhexdhexaadiyaha	27
Meelaynta Ilmaha Iyadoo Markaa Cabashada iyo Dacwad Dhageysiga Nidaam Cadaaladeedka La sugayo	28
Habka Xallinta.....	28
Kulanka Xallinta.....	28
Muddada xallinta.....	29
Wax ka yara beddelka ama hagaajinta muddada xallinta 30-maalmood ee taariikh jadwaleedka	30
Heshiis dejinta qoran.....	30
Muddada dib u eegista heshiiska	30
Dacwad Dhegeysiga Cabashooyinka Nidaam Cadaaladeedka	30
Dacwad dhegeysiga Nidaam Cadaaleedka Eexla'aanta ah	30
Sarkaalka Dacwad Dhegeysiga ee Eex La'aanta ah.....	30
Mawduuca dacwad dhagaysiga nidaam cadaaladeedka.....	31
Wakhti jadwaleedka codsashada dacwad dhageysi.....	31
Ka reebitaanada wakhti jadwaleedka	31
Xuquuqaha Dacwad Dhageysiga	31
Guud ahaan.....	31
Shaacinta dheeraadka ah ee macluumaadka	32
Xuquuqda waalidka ee marka la joogo goobta dacwad dhageysiga	32
Go'aamada Dacwad Dhageysiga	32

Go'aanka Sarkaalka Dacwad Dhageysiga Qaadaaya	32
Qodobka dhismaha.....	33
Codsiga gooniga ah ee ku aadan dacwad dhageysiga nidaam cadaaleedka	33
Natiijooyinka iyo go'aanka loo soo bandhigaayo guddiga la-talinta iyo dadweynaha guud	33
Racfaan Qaadaashada	33
Dhamaadka Go'aanka; Racfaanka; Dib u eegis Aan eexda lahayn.....	33
Dhammaadka go'aanka dacwad dhegeysiga.....	33
Waqti Jadwaleedka iyo Habboonaanta Dacwad Dhageysiga iyo Dib u eegitaanada.....	33
Tallaabooyinka Madaniga ah, oo ay ku jiraan wakhtiga lagu xareynayo Tallaabooyinkaas ...	34
Guud ahaan.....	34
Xaddidaata Waqtiga	34
Habraacyo dheeraad ah	34
Awoodda sharciyeedka maxkamadaha degmada	34
Xeerka dhismaha.....	34
Khidmadaha/Kharashaadka Qareenada	35
Guud ahaan.....	35
Abaalmarinta khidmadaha.....	35
Habraacyada Marka La Edbinaayo Carruurta Naafada ah	36
Maamulka Shaqaalaha ee Dugsiga.....	36
U go'aaminta kiis-ba-kiis.....	36
Guud ahaan.....	37
Awood maamuleedka dheeraad ah	37
Adeegyada	37
Go'aaminta muujinta	38
Go'aaminta in habdhaqankaasi ahaa muujinta naafada ee ilmaha	38
Duruufaha gaarka ah.....	38
Qeexitaannada.....	39
Wargelinta.....	39
Beddelida Meelaynta Sabab ah Ka saarida Anshaxa Awgeed	39
Go'aaminta Goobta	40
Racfaan	40

Guud ahaan.....	40
Awooda sarkaalka qaadaya dacwad dhageysiga	40
Meeleynta Inta Lagu Jiro Meeleynta	41
Ilaalinta loogu talagalay Carruurta Aan Wali U Qalmin Waxbarashada Gaarka ah iyo Adeegyada La Xidhiidha	41
Guud ahaan.....	42
Gundhiga aqoonta ee loogu talagalay arrimaha anshax-marinta.....	42
Ka reebitaanka	42
Shuruudaha khuseeya haddii aanay jirin wax gundhig aqooneed ah.....	42
U-gudbinta iyo Talaabada ay Qaadayaan Sharci-fulinta iyo Masuuliyiinta Garsoorka	43
Gudbinta diiwaanada.....	43
Shuruudaha Ku Meelaynta Halka Dhinac ah ee Waalidiinta Caruurta ee Dugsiyada Madaxa Banaan Iyadoo La Isticmaalayo Kharashka Dawlada	43
Guud ahaan.....	43
Lacag celinta meelaynta dugsiyada madaxa banaan	44
Xaddidaadda ku aadan lacag-celinta	44

Ogeysiiska Ilaalinta/Dhawrista Habraaca: Xuquuqda Waalidiinta Ardayda Naafada Qabaan

Xeerka Waxbarashada Shaqsiyaadka Naafada ah (The Individuals with Disabilities Education Act, IDEA), sharciga federaaliga ee khuseeya waxbarashada ardayda naafada ah, wuxuu u baahan yahay in dugsiyadu siiyaan waalidiinta ilmaha naafada ah ogeysiis ay ku jiraan sharraxaad buuxda oo ku saabsan ilaalinta habraacyada ee laga heli karo sida hoos timaada IDEA iyo Wakaaladda Waxbarashada ee Vermont. Xeerarka Waxbarashada Gaarka ah ee Waxbarashada (Dhammaan tixraacyada xeerarka waxaa laga heli karaa [Buugga Xeerarka iyo Habdhaqanada ee Guddiga Waxbarashada ee Gobolka Vermont](#); Tixraaca 34 Xeerka Qawaaniinta Federaalka (Code of Federal Regulations, CFR) Qaybta 300 waxaa laga heli karaa gudaha [Diiwaanka Federaalka](#)).

Waxaad xaq u leedahay xuquuqda waalidnimo haddii aad tahay:

- waalidka ah ama waalidka korsaday
- masuul (Fadlan ogow in haddii ilmo uu ku jiro gacanta Waaxda Carruurta iyo Qoysaska ee Vermont (Vermont Department of Children and Families, DCF), gobolku ma noqon karo masuulka ilmaha.)
- qof metalaaya sida inuu yahay waalidka, sida awoowe/ayeeyo ama adeer/eedo lamaane la ah waalidka kaas ama taasoo uu ilmuhu la nool yahay oona si sharci ah masuul uga ah ilmaha
- waalid uu doortay [Barnaamijka Waalidka Ku Metalaaya Arrimaha Waxbarashada Ardeyga Naafadaha ah ee Vermont 'Vermont Educational Surrogate Parent Program'](#) sida uu qabo VTSBE 2368; 34 CFR Qeybta 300.519
- waalidka koriinka leh kaas/taas oo loo magacaabay waalidka u metalaaya arrimaha waxbarashada ardeyga naafada ah

Waa inaad ka heshaa nuqul xuquuqdaada ah dugsiya ilmahaaga marka:

- qiimaynta hore ama dib u qiimaynta ilmahaaga la qorsheeyo; ama
- adiga ama dugsigu codsato(do) dacwad dhagaysi cadaaladeed; ama
- aad xareysato cabasho ka dhan ah maamulka; ama
- marka aad sameyso codsigaaga; ama
- ugu yaraan sannad kasta

Xuquuqda waxbarashada gaarka ah ee ugu muhiimsan ayaa ku siinayaan xaq in:

- lagugu ogeysiyo go'aamada muhiimka ah ee ku saabsan waxbarashada cunugaaga
- aad bixiso ogolaanshahaaga ka hor inta aan ilmahaaga la qiimayn, ka hor inta aanu ilmahaagu helin waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha, iyo ka hor inta aan macluumaadka qarsoodiga ah ee ilmahaaga la sii dayn
- aad ka qaybqaadato shirarka ku saabsan qiimaynta ilmahaaga, u-qalmitaankiisa/keeda ee ku aadan waxbarashada gaarka ah, barnaamij waxbarashadeedka, iyo meelaynta
- aad marin u hesho diiwaanada waxbarashada ilmahaaga iyo in diiwaanadaas lagu xafido si qarsoodi ah
- aad racfaan ka qaadato go'aannada aad khilaafto

Talooyinka Waalidka ee Xeerarka Waxbarashada Gaarka ah ee Vermont

Curinta iyo dib u eegis ku samaynta IEP-ga ilmaha waxa ka mid ah talooyinka waalidka inta uu socdo habka, oo ay ku jiraan talooyinka gaarka ah ee ku saabsan heerarka waxbarasho iyo waxqabadka shaqeenaya ee ilmahooda ee hadda. Talada waalidka waxa lagu daraa iyada oo loo sii marayo Qaybta Talada Waalidka ama Bogga ku yaala gudaha IEP-ga ama si lifaaq ahaan ah iyada oo loo sii marayo Foomka Talada Waalidka (Foomka #12 ama hab kale oo lagu ururiyo talada Waalidka) oo uu la socdo

bayaan tixraacaya Foomka ku jira gudaha dukumeentiga IEP-ga. Foomka Talada Waalidku waxa uu noqdaa qayb ka mid ah faylka ardayga. Waalidiinta bixinaya talooyinka qoraalka ah waxay xaq u leeyihiin iney dhameeyaan oo ay u soo diraan kooxda IEP-ga toban (10) maalmood gudahooda ka dib markay helaan IEP-ga, ka dib markii la qabtay kulanka IEP si loo qoro ama wax looga beddelo IEP-ga. Waalidka(diinta) waxaa lagu wargelin doonaa inay soo celiyaan foomka (ama habka kale ee lagu soo uruurinayo talada Waalidka) 10 maalmood gudahooda haddii ay hayaan jawaab celin dheeraad ah ama fikrado.

Waa ay habboon tahay laguna dhiirigelinayaa waalidiinta inay bixiyaan fikrado si hadal ahaan ah inta lagu jiro kulanka IEP, si ay degmadu ugu darto IEP-ga qoran. Bogga Fikrada/Talada Waalidka ee kor lagu sharraxay waxa uu siinayaa hab kale oo ay waalidiinta ku bixin karaan fikraddaha, laakiin tan waa in aan loo fasirin in ay ka hortagayso talooyinka loo bixinaayo sida hadal ahaanta ah in la diiwaangeliyo. Intaa waxaa dheer, waalidiintu waxay ka tanaasuli karaan xaqa ay u leeyihiin inay bixiyaan talada waalidka haddii ay doortaan. Haddii waalidku diido ama uusan bixin jawaab celin, LEA waa inay ku muujisaa xaaladdan gudaha qaybta Talada/Fikrada Waalidka ee gudaha IEP-ga.

IEP waxaa loo tixgalin doonaa in 'uu diyaarsan yahay' laga bilaabo taariikhda lagu tilmaamay inay tahay taariikhda dhaqangelinta gudaha Ogeysiiska Horay Loo Qoray. Kulan dambe oo dib loogu eegayo talooyinka wax ka beddelaya IEP-ga, haddii la qabto, waxay keeni doonaan in la sameeyo IEP iyo Ogeysiis Horay Loo Qoray oo cusub.

Haddii waalidku ku khilaafa kooxda IEP-ga ama uu bixiyo talo cusub oo u baahan in ka doodista dheeraadka ah ee kooxda IEP-ga, LEA waa inay qabato shir dheeraad ah haddii nuxurka jawaab celinta waalidku ay sidaas damaanad qaadeyso. Tani waxay badanaa qaadan doontaa qaabka macluumaad cusub oo aan horay looga hadlin gudaha shirka IEP-ga, ama walaacyada ku saabsan habka IEP ee u baahan in wax laga qabto. Marxalladan oo kale LEA waxay xaqiijin doontaa helitaanka jawaab-celinta oo waxaana laga yaabaa inay u qorsheeyaan kulan rasmi ah oo IEP ah oo dheeraad ah kooxda IEP-ga si ay u tixgeliyaan talada la soo bixiyay, ama kulan gaar ah oo lala yeesho maareeyaha kiiska ama maamulaha waxbarashada gaarka ah. LEA waa in ay bixisaa kulan dhameystiran oo IEP-ga looga hadlaayo haddii uu waalid codsado. Wax ka beddel kasta ayaa la sameyn karaa iyadoo la isticmaalayo foomka 5B, sida uu qabo habka caadiga ah ee wax ka beddelka IEP inta u dhaxaysa shirarka sannadlaha ah.

Fikrad Bixinta Waalidka ee ku aadan Nuxurka IEP-ga

Qoraalka laga soo qaatay Xeerka Waxbarashada Gaarka ah ee Vermont 2363.7 Nuxurka IEP-ga (34 C.F.R. § 300.320):

(j) Talada Waalidka. IEP-ga waa inuu ka koobnaadaa qayb loogu talagalay waalidiinta si ay ugu bixiyaan faallooyin qoran oo ku saabsan IEP-ga ilmahooda. Ka dib kulanka IEP si loo qoro ama wax looga beddelo IEP-ga, LEA waa inay waalidka u soo dirtaa IEP-ga oo ay la socoto ogeysiis go'aanka horay loo qoray. Waalidka waa in la siiyaa 10 maalmood si uu u dhamaystiro oo uu ku soo celiyo qaybta fikrad bixinta ama talada waalidka ee IEP-ga. Ujeedada qaybta talo bixinta waalidka ayaa ah in la fududeeyo jawaab-celinta ka socda qoysaska si loo xaqiijiyo inay helaan fursad ay ku muujiyaan ra'yi kasta oo ku saabsan IEP-ga ama nidaamka IEP-ga. Kadib marka la helo talada waalidka, LEA ayaa laga yaabaa, laakiin loogama baahna, inay jadwaleyso kulan lagaga hadlayo walaacyada waalidka.

Macluumaadka guud

Ogeysiiska Horay Loo Qoray

Ogeysiis

Dugsiga degmada ama ururka kormeerka waa in ay ku siiyaan ogaysiis qoran (macluumaadka qoraal ahaan), markasta oo ay:

1. Soo jeedinaysaa in la bilaabo ama la beddelo aqoonsiga, qiimaynta, ama meelaynta waxbarashada ilmahaaga, ama siinta waxbarashada dadweynaha ee habboon ee bilaashka ah (free appropriate public education, FAPE) ilmahaaga; ama
2. Ay diido ineey bilaabto ama beddesho aqoonsiga, qiimaynta, ama meelaynta waxbarashada ilmahaaga ama siinta FAPE ilmahaaga; ama
3. Aysan dhamaystirin qiimaynta hore ama aysan qaban shirka qiimaynta 15 maalmood gudahooda marka ay hesho soo gudbin; ama
4. La kulanto dib u dhac ku yimaada dhamaystirka qiimaynta hore taas oo ka badan 60 maalmood, oo ay la socdaan faahfaahin tilmaamayaan taariikhda dhamaystirka ee la filan karo

Xeerka 2365.1.1; 2362.2.1; 34 CFR §300.503; §300.306

Nuxurka ogeysiiska

Ogeysiiska qorani waa inuu:

1. Sharaxaa tallaabada ay dugsi degmadaadu ama ururkaaga kormeerku ay soo jeediyaan ama ay diidaan inay qaataan
2. Sharaxaa sababta dugsiga degmadaadu ama ururkaaga kormeerku ay u soo jeedinayaan ama u diidayaan in ay tallaabada qaadaan
3. Sharaxaa habraaca indho indheynta, qiimaynta, diiwaanka, ama warbixinta kasta ee dugsiga degmadaadu ama ururkaaga kormeerku ku isticmaalay go'aaminta soo jeedinta ama diidmada ku aadan ficilka/tallaabada
4. Ku daraa bayaan taas oo muujineysa inaad heysato ilaalin hoos timaada qawaaniinta ilaalinta habraaca ee Qaybta B ee IDEA iyo Xeerarka Waxbarashada Gaarka ah ee Vermont
5. Kuu sheegaa sida aad ku heli karto sharraxaadda ilaalinta habraaca haddii tallaabada ay dugsiga degmadaadu ama ururkaaga kormeerka ay soo jeedinayaan ama ay diidayaan aanay ahayn gudbinta hore ee ku aadan qiimaynta
6. Ku daraa macluumaad laguugu talagalay adiga si aad ugula soo xidhiidho caawin ku aadan fahmida Qaybta B ee IDEA iyo Xeerarka Waxbarashada Gaarka ah ee Vermont
7. Sharaxaa xullashooyinka kale ee kooxda barnaamijka waxbarashada gaarka ah ee ilmahaaga (individualized education program, IEP) ay tixgeliyeen iyo sababaha xullashooyinkaas loo diiday; iyo
8. Bixiyaa sharaxaadda sababaha kale ee dugsiga degmadaadu ama ururkaaga kormeerku ay u soo jeediyeen ama u diideen tallaabada

Ogaysiis ku qoran luqad la fahmi karo

Ogeysiisku waa in:

1. Lagu qoraa luqad ay dadweynuhu fahmi karaan; iyo
2. Lagu bixiyaa luqadaada hooyo ama qaab kale oo isgaarsiineed oo aad isticmaasho, haddii aysan ka ahayn iney si cad u suurta gal ahayn in sidaas la yeelo

Haddi luuqadaada hooyo ama habka kale ee isgaarsiineed aanu ahayn luqad qoran, dugsiga degmadaada ama ururkaaga kormeerka waa inay xaqiijiyaan in:

1. Ogeysiiska laguugu turjumo si hadal ah iyadoo la adeegsanayo afkaaga hooyo ama qaab kale oo isgaarsiineed
2. Aad fahantay waxa ku qoran ogaysiiska; iyo
3. Ay jirto cadaymo qoran oo sheegaya in 1 iyo 2 lala kulmay

Afka Hooyo

Afka hooyadu, marka loo isticmaalo shaqsi aqoontiisa Ingiriisigu xaddidan tahay, waxeey la macno tahay iney tahay kuwan soo socda:

1. Luuqada uu qofkaasi sida caadiga ah u isticmaalo, ama, marka loo eego ubadka, ay tahay luuqada sida caadiga ah ay isticmaalaan waalidka ilmaha
2. Luuqadda ay ilmuhu sida caadiga ah ku isticmaalaan guriga ama deegaanka waxbarashada

Qofka dhegoolka ah' ama indhoolaha ah, ama qof aan lahayn luqad qoran, habka isgaarsiinta qofkaasi waa waxa uu qofku caadi ahaan u isticmaalo (sida luqadda dhagoolaha, Farta indhoolaha, ama isgaarsiinta hadalka ah).

34 CFR §300.29

Iimaylka

Haddii dugsi degmadaadu ama ururkaaga kormeerku ay u soo bandhigaan waalidiinta ikhtiyaarka ah ku helitaanka dukumeentiyada iimayl ahaan, waxaad dooran kartaa inaad ku hesho iimayl ahaan kuwan soo socda:

1. Ogeysiiska horay loo qoray
2. Ogeysiiska ilaalinta habraaca; iyo
3. Ogeysiisyada la xidhiidha cabashada nidaam cadaaladeedka

Xeerka 2365.1.1(h) (4); 34 CFR §300.505

Oggolaanshaha Waalidka - Qeexida

Oggolaanshu macnihiisu waa:

1. In si buuxda laguugu wargeliyay afkaada hooyo ama qaab kale oo isgaarsiineed (sida luqadda dhegoolaha, farta indhoolaha, ama isgaarsiinta hadalka ah) dhammaan macluumaadka ku saabsan tallaabada aad oggolaanshaha ku bixineyso.
2. Inaad fahansan tahay oo aadna si qoraal ahaan ah ku oggolaaneysaa tallaabadaas, iyo in oggolaanshahu sharaxaayo tallaabadaas oo uuna liis gareenayo diiwaanada (haddii ay jiraan) la sii deyn doono iyo cidda loo sii deyn doono; iyo:
3. Inaad fahamsan tahay in oggolaanshahaagu uu yahay mid ikhtiyaari ah oo aad ka noqon karto oggolaanshahaaga wakhti kasta.

Ka noqoshadaada ma burineyso (ka laabaneyso) fal/tallaabo dhacday kadib markaad bixisay ogolaanshahaaga iyo ka hor inta aanad ka noqon.

Xeerka 2365.1.3; 34 CFR §300.9

Oggolaanshaha Waalidka

Eeg [34 CFR §300.300](#) wixii ah faahfaahinta ku saabsan oggolaanshaha waalidka.

Oggolaanshaha Qiimeynta Hore

Dugsiga degmadaada ama ururkaaga kormeerka ma samayn karaan qiimaynta hore ee ilmahaaga si ay u go'aamiyaan in ilmahaagu u qalmo sida hoos timaada Qaybta B ee IDEA iyo Xeerarka Waxbarashada Gaarka ah ee Vermont iyaga oo aan marka hore ku siin ogaysiis hory loo qoray oo ku saabsan talaabada la soo jeediyay iyo iyagoona aana helin ogolaanshahaaga sida lagu sharxay dukumeentiga lagu tixraacay hoosta ciwaanka Oggolaanshaha Waalidka.

Dugsiga degmadaadu ama ururkaaga kormeerku waa inay sameeyaan dadaal macquul ah si ay u helaan oggolaanshahaaga xog ogaalka aad u ahayd ee ku aadan qiimaynta hore si ay u go'aamiyaan in ilmahaagu yahay ilmo naafo ah iyo in kale.

Oggolaanshahaaga qiimaynta hore macnaheedu maaha inaad sidoo kale siisay oggolaanshahaaga dugsiga degmadaada ama ururkaaga kormeerka si ay u bilaabaan bixinta waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha ilmahaaga.

Haddii ilmahaagu ka diiwaangashan yahay dugsiga dadweynaha ama aad raadinayso inaad ilmahaaga ka diwaangeliso dugsiga dadweyne oo aadna diidday inaad bixiso oggolaanshaha ama aad ka jawaabi waydo codsiga ah inaad bixiso oggolaanshaha qiimaynta hore, dugsiga degmadaadu ama ururkaaga kormeerka ayaa laga yaabaa, laakiin loogama baahna, in ay raadiyaan in ay sameeyaan qiimaynta hore iyagoo adeegsanaya dhexdhexaadin, iyagoo adeegsanayo nidaam cadaaladeed, ama dib u eegis ku sameenaya xog horay u sii jirtay. Dugsiga degmadu/ururka kormeerku waxa uu go'aansan karaa in aanu sii wadin qiimaynta oo ayna ku diiwaangeliyaan sababta ay sidaas u yeelayaan gudaha diiwaanka ilmaha. Dugsiga degmadaadu ama ururkaaga kormeerku ma jabin doono waajibadkooda ah inay helaan, aqoonsadaan oo qiimeeyaan ubadkaaga haddi aanay sii wadin qiimaynta uu waalidku ku guuldareystay inuu bixiyo oggolaanshaha looga baahnaa.

Xeerarka gaarka ah ee loogu talagalay qiimaynta hore ee waadhka Gobolka

Marka la eego ilmo ka tirsan waadhka ka mid ah Gobolka oo aan la noolayn waalidkiis/keeda, dugsiga degmadu ugama baahna oggolaanshaha waalidka qiimaynta hore si loo go'aamiyo haddii ilmuhu yahay ilmo naafo ah haddii:

1. Inkasta oo ay jiraan dadaallo macquul ah oo lagu samaynayo sidaas, dugsiga degmadu ma heli karto waalidka ilmaha.
2. Xuquuqda waalidka loo joojiyay si waafaqsan sharciga gobolka; ama:
3. Garsoore uu u xilsaaray xaq u lahaanshaha gaadhida go'aamada ku aadan waxbarasho iyo oggolaanshaha qiimaynta hore shakhsi aan ahayn waalidka.

Waadh ka mid ah Gobolka, sida loogu isticmaalo gudaha IDEA, macnaheedu waa in ilmo, sida uu go'aamiyay Gobolka uu ilmuhu ku nool yahay, yahay mid ah:

1. Ilmo la korsado

2. Loo tixgeliyay waadh ka tirsan Gobolka marka loo eego sharciga Gobolka; ama
3. Kujira gacan ku heynta hay'ad dadweyne oo daryeesha carruurta

Waadhka Gobolku kuma daro ilmo la korsado kaasoo/taasoo leh waalid koriyey.

Oggolaanshaha waalidka ee ku aadan adeegyada

Dugsiga degmadaada ama ururkaaga kormeerka waa inay helaan oggolaanshahaaga xog ogaal aad u ahayd ka hor intaysan siin waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha ubadkaaga marka ugu horeysa waana inay sameeyaan dadaal macquul ah si ay u helaan oggolaanshahaaga aad xog ogaalka u ahayd.

Haddii aadan ka jawaabin codsiga ah ku aadan inaad bixiso oggolaanshahaaga ku aadan in ilmahaagu helo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha markii ugu horeysay, ama haddii aad diido inaad bixiso oggolaanshahan, dugsiga degmadaadu ama ururkaaga kormeerku ma isticmaali karaan ilaalinta habraaca (waxaa loola jeedaa, dhexdhexaadinta, cabashada nidaam cadaaladeedka, kulan xallineed, ama dhageysiga habraaca cadaaladeed ee dhexdhexaad ah) si loo helo heshiis ama go'aan ah in waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira (oo ay ku taliyeen kooxda IEP ee ilmahaada) in la siiyo ilmahaaga la'aanta oggolaanshahaaga.

Haddii aad diido inaad bixiso oggolaanshahaaga ku aadan in ilmahaagu helo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha markii ugu horreysay, ama haddii aad ka soo jawaabi weydo codsiga ah inaad bixiso noocaas oggolaanshaha ah oo dugsiga degmadaaduna ama ururkaaga kormeerku aanay siin ilmahaaga waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha kuwaas oo ay ku doonteen oggolaanshahaaga, dugsiga degmadaadu ama ururkaaga kormeerku:

1. Kuma xadgudbaayo shuruuda ah in uu uga dhigo waxbarashada dadweynaha ee ku haboon ee bilaashka ah (FAPE) mid u diyaar ah ubadkaaga ku guul daraysigeeda ku aadan siinta adeegyadaas ubadkaaga; onna:
2. Looma baahna in la yeesho kulan looga hadlaayo barnaamijka waxbarashada gaarka ah (IEP) ama loogu curinaayo IEP ilmahaaga kaas oo loogu talagalay waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha kuwaas oo oggolaanshahaaga lagu codsaday.

Ka noqoshada oggolaanshaha waalidka ee ku aadan adeegyada

Waxaad xaq u leedahay inaad ka noqoto oggolaanshahaaga ku aadan adeegyada waxbarashada gaarka ah wakhti kasta ka hor ama ka dib bilaabashada adeegyadaas.

Haddii aad sidaa samayso, dugsiga degmadaadu ama ururkaaga kormeerku ma codsan karaan dhexdhexaadin ama dacwad dhegaysiga nidaamka cadaaladeed.

Intaa waxa dheer, in ilmahaaga la ilaalin doonin marka loo eego xagga anshaxa ee hoos timaada xeerarka waxbarashada gaarka ah.

Haddii aad ka noqoto oggolaanshaha, ilmahaagu waxa laga yaabaa in wali laga sii ilaaliyo takoorka sida hoos timaada Qaybta 504 ee Sharciga Dhaqancelinta ee 1973 oo waxaadna codsan kartaa in dugsigu tixgeliyo waxa ku habboon ee ilmahaagu xaq u yeelan karo sida hoos timaada Qaybta 504.

Oggolaanshaha waalidka ee ku aadan dib u qiimeynada

Dugsiga degmadaadu ama ururkaaga kormeerku waa inay helaan ogolaanshahaaga aad xog ogaalka u ahayd ka hor inta aanay dib u qiimayn ilmahaaga, haddii aysan ahayn in dugsiga degmadaadu ama ururkaaga kormeerku ay muujin karaan taas

1. Ineey qaadeen tillaabooyin macquul ah si loo helo oggolaanshahaaga dib-u-qiimaynta ilmahaaga; oona:
2. Aadan ka soo jawaabin

Haddii aad diido inaad oggolaansho siiso dib u qiimaynta ilmahaaga, dugsiga degmadaada ama ururkaaga kormeerka ayaa laga yaabaa, laakiin loogama baahna inay, iney ku raadiyaan qiimaynta ubadkaaga iyagoo isticmaalaya dhexdhexaadin, cabashada nidaamka cadaaladeedka, kulan xallineed, iyo nidaamka dacwad dhegaysiga cadaalada ah si ay u raadiyaan inay meesha ka saaraan diidmadaada ku aadan oggolaanshaha dib u qiimaynta ilmahaaga. Marka la eego qiimaynadii hore, dugsiga degmadaadu kuma xad gudbin waajibadkiisa sida hoos timaada Qaybta B ee IDEA haddii uu diido inuu sidan ku sii raadiyo dib u qiimaynta.

Dukumeentiyeeynta dadaalada macquulka ah ee lagu helaayo oggolaanshaha waalidka

Dugsigaagu waa inuu sii hayaa dukumeenti ku saabsan dadaalkiisa macquulka ah si uu u helo oggolaanshaha waalidka ee ku aadan qiimaynta hore, si uu u siiyo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha markii ugu horeysay, si dib loogu qiimeeyo oona loogu helo waalidiinta ka socda waadhadhka Gobolka qiimaynada hore. Dukumeentiyeeyntu waa in ay ku jiraan diiwaanka isku dayada ee dugsiga degmadaada ama ururkaaga kormeerka ee ku aadan goobahan, sida:

1. Warbixino faahfaahsan ee wicitaanada taleefoonada ee la sameeyay ama la isku dayay iyo natiijooyinka wicitaanadaas;
2. Koobiyada waraaqaha loo diray waalidiinta iyo jawaabaha laga helay; iyo
3. Warbixin faahfaahsan oo ku saabsan booqashooyinka gurigaaga ama goobta shaqada iyo natiijooyinka booqashooyinkaas.

Shuruudaha oggolaanshaha ee kale

Oggolaanshahaaga looma baahna ka hor inta aanay dugsiga degmadaadu ama ururkaaga kormeerku laga yaabo:

1. Inuu dib u eegis ku sameeyo xogta jirta taas oo qayb ka ah qiimaynta ilmahaaga ama dib u qiimaynta; ama
2. Inuu siiyo ilmahaaga imtixaan ama qiimayn kale oo la siiyo dhammaan carruurta haddii aysan ahayn, in ka hor imtixaankaas ama qiimayntaas, oggolaanshaha looga baahan yahay dhammaan waalidiinta carruurta oo dhan

Dugsi degmadaadu ama ururkaaga kormeerku uma isticmaali karaan diidmadaada inaad oggolaansho ka bixiso hal adeeg ama hawl si ay kuugu diidaan adiga ama ilmahaaga adeeg, faa'iido, ama waxqabad kale.

Haddii aad ilmahaaga ka diiwaangelisay dugsi madax-bannaan adoona adeegsanaya kharashkaaga ama aad guriga waxbarashada ugu qabatay ilmahaaga, oo aadan siin oggolaanshahaaga qiimaynta hore ee ubadkaaga ama dib u qiimaynta ilmahaaga, ama aadan ka jawaabin codsiga la rabo inaad ku bixiso oggolaanshahaada, dugsiga degmadaadu ama ururkaaga kormeerku ma isticmaali karaan dhexdhexaadin, cabashada nidaamka cadaaladeed, kulan xallineed, ama dacwad dhageysiga habraaca cadaaladeed ee dhexdhexaadka ah si ay meesha uga saaraan diidmadaada ku aadan oggolaanshaha, loogamana baahna inay u tixgeliyaan ubadkaaga mid u qalma inuu helo adeegyo loo siman yahay (adeegyada loo fidiyay carruurta naafada ah ee dugsiga madax bannaan ee ay waalidku ku meeleyeen).

Qiimeynta Waxbarasheed Madaxa-banaan

Xeerka 2362.2.8; 34 CFR §300.502

Guud ahaan

Sida hoos lagu sharaxay, waxaad xaq u leedahay inaad hesho qiimaynta waxbarashada madaxa banaan (independent educational evaluation, IEE) ee ubadkaaga haddii aadan ku raacsanayn qiimaynta ilmahaaga ee ay heshay dugsiga degmadaada ama ururkaaga kormeerka.

Haddii aad codsato IEE, dugsiga degmadaadu ama ururkaaga kormeerka waa in ay ku siiyaan macluumaadka ku saabsan meesha aad ka heli karto IEE iyo wax ku saabsan shuruudaha dugsiga degmada ama ururka kormeerka ee lagu dabaqo IEE-yada.

Qeexitaannada

Qiimaynta waxbarashada madaxa banaan macneheedu waa qiimayn uu sameeyo imtaxaane aqoon leh oo aan u shaqayn dugsiga degmadaada ama ururkaaga kormeerka ee masuulka ka ah waxbarashada ubadkaaga.

Kharashka dawlada waxa loola jeedaa in dugsiga degmadaadu ama ururkaaga kormeerku ay bixinayaan kharashka dhameystiran ee qiimaynta ama ay xaqiijinayaan in qiimayntu si kale laguugu siiyo si bilaash ah.

Xaqa waalidku u leeyahay qiimaynta iyadoo la isticmaalayo kharashka dawlada

Waxaad xaq u leedahay qiimaynta waxbarashada madaxa banaan ee ilmahaaga oo ayna kharashku bixinayso dawlada haddii aanad ku raacsanayn qiimaynta ilmahaaga ee ay heleen dugsiga degmadaada ama ururkaaga kormeerka, iyadoo la raacayo shuruudaha soo socda:

1. Haddii aad codsato qiimayn waxbarasho oo madaxbannaan oo ku saabsan ilmahaaga adoona adeegsanaya kharashka dawlada, dugsiga degmadaadu ama ururkaaga kormeerku waa in, iyada oo aan dib loo dhigin aan loo baahnayn, midkood: (a) Xareeyaa cabashada habraaca cadaaladeed si uu u codsado dacwad dhageysi si uu u muujiyo in qiimayntiisa ee ku aadan ubadkaagu ay haboontahay; ama (b) Bixiyo qiimayn waxbarasho oo madax-banaan oo uuna isticmaalayo kharashka dawlada, haddii aysan ahayn in dugsiga degmadaadu ama ururka kormeerku ay ku muujiyaan dacwad dhegeysi in qiimaynta ilmahaaga ee aad heshay aanay buuxin shuruudaha dugsiga degmada.
2. Haddii dugsiga degmadaada ama ururkaaga kormeerka uu codsado dacwad dhageysi oo uuna go'aanka kama dambaysta ah uu noqdo in qiimaynta dugsiga degmadaada ama ururkaaga kormeerka ee ilmahaaga ay haboon tahay, waxaad weli xaq u leedahay qiimayn waxbarasho oo madax banaan, laakiin maaha mid ay bixineyso kharashka dawlada.
3. Haddii aad codsato qiimaynta waxbarashada madaxa banaan ee ilmahaaga, dugsiga degmadaadu ama ururkaaga kormeerka waxa laga yaabaa inay ku wayddiiyaan sababta aad u diiddan tahay qiimaynta ilmahaaga ee ay heleen dugsigaaga degmada ama ururkaaga kormeerka. Si kastaba ha ahaatee, dugsiga degmadaadu ama ururkaaga kormeerku waxa laga yaabaa in aanay u baahnayn sharaxaad lagana yaabo in aanay si aan macquul ahayn dib ugu dhigin midkood bixinta qiimaynta waxbarasho ee madaxa banaan ee ubadkaaga oo ayna dabooleyso kharashka dad waynaha ama ka xeraynta cabasho nidaam cadaaladeed si aad u codsato dacwad dhagaysi cadaalad ah si looga difaaco dugsiga degmadaada ama ururkaaga kormeerka dacwada ku aadan qiimaynta ilmahaaga.

Waxa aad xaq u leedahay hal qiimayn waxbarasho oo madax banaan oo ilmahaaga oo ayna dabooleyso kharashka dawlada mar kasta oo dugsiga degmadaadu ama ururkaaga kormeerka ay sameeyaan qiimaynta ubadkaaga taas oo aad diidan tahay.

Qiimeynada Ay Waalidiintu-bilaabeen

Haddii aad hesho qiimayn waxbarasho oo madaxbannaan oo ilmahaaga iyadoo la adeegsanayo kharashka dawladda ama aad la wadaagto dugsiga degmadaada ama ururkaaga kormeerka qiimaynta ilmahaaga oo aad ku heshay kharash shakhsi ahaaneed:

1. Dugsiga degmadaadu ama ururkaaga kormeerku waa inay tixgeliyaan natiijooyinka qiimaynta ilmahaaga, haddii ay buuxiso shuruudaha dugsiga degmadaada ama ururkaaga kormeerka ee loogu talagalay qiimaynta waxbarasho ee madaxa banaan, go'aan kasta oo la gaadho ee la xidhiidha bixinta waxbarashada guud ee ku haboon ee bilaashka ah (FAPE) ubadkaaga; oona
2. Adiga ama dugsiga degmadaada ama ururkaaga kormeerka laga yaabaa inaad ku soo bandhigtaan qiimaynta caddayn ahaan waqtiga dacwad dhegeysiga nidaam cadaaladeedka ee khuseeya ilmahaaga.

Codsiyada ku aadan qiimeynta ee saraakiisha dacwada dhegeysanayaan

Haddii sarkaalka dacwada dhegaysanaya uu codsado qiimayn waxbarasho oo madaxbannaan oo ku saabsan ilmahaaga si qayb ka ah dacwad dhegeysiga nidaam cadaaladeedka, kharashka qiimayntu waa inuu noqdaa mid ay dawladdu bixiso.

Shuruudaha dugsiga degmada / ururka kormeerka

Haddii qiimayn waxbarasho oo madax-bannaani ay bixineyso kharashka dawlada, shuruudaha habka qiimaynta lagu helay, oo ay ku jiraan goobta qiimayntu ka dhacayso iyo shahaadooyinka imtixaan qaadaha, waa inay la mid noqdaan shuruudaha dugsiga degmadaada ama ururkaaga kormeerka ay isticmaalaan marka ay bilaabayaan qiimayn. Marka laga reebo shuruudaha kor lagu sharraxay, dugsiga degmada ama ururka kormeerka ma soo rogi karaan shuruudo ama wakhtiyo la xidhiidha helitaanka qiimayn waxbarasho oo madax-bannaan oo ay dawladdu kharashkeeda bixineyso.

Sir ahaanshaha Macluumaadka

Qeexitaannada

Sida loogu adeegsaday ciwaanka Sir ahaanshaha Macluumaadka:

- Burburinta macneheedu waa burburin jireed ama ka saarida aqoonsiga shakhsi ahaaneed emacluumaadka si aan macluumaadka loogu sii aqoonsan karin shakhsi ahaan.
- Diiwaanada waxbarashadu macnehoodu waa nooca diiwaanada lagu daboolay qeexida "diiwaanada waxbarashada" ee gudaha 34 CFR Qaybta 99 (xeerarka fulinaya Xeerka Xuquuqda Waxbarashada Qoyska iyo Qarsoodnimada ee 1974, 20 U.S.C. 1232g (FERPA)).
- Wakaalad ka qayb qaadata macneheedu waa dugsi ama ururka kormeer kasta, wakaalad ama hay'ad machad uruuriya, ilaaliya, ama adeegsada macluumaadka shakhsi ahaan lagu aqoonsan karo, ama macluumaadka lagu helay, sida hoos timaada Qaybta B ee IDEA iyo Xeerarka Waxbarashada Gaarka ah ee Vermont.

Xeerka 2365.2 34; CFR §300.611

Shakhsi ahaan Lagu aqoonsan karo

Shakhsi ahaan lagu aqoonsan karo macneheedu waa macluumaadka leh:

- Magaca ilmahaaga, magacaaga ka waalid ahaan, ama magaca xubin kale oo qoyska ah;
- Cinwaanka ilmahaaga;
- Aqoonsiga shakhsi ahaaneed, sida lambarka soshal sekuritiga ama lambarka ardayga ee ilmahaaga; ama
- Liiska sifooyinka gaarka ah ama macluumaadka kale ee suurtoagal ka dhigaya in lagu aqoonsado ilmahaaga si macquul ah.

34 CFR §300.32

Ogeysiiska ku socda Waalidiinta

Wakaalada Waxbarashada ee Vermont waa in ay siisaa ogaysiis ku filan si ay si buuxda ugu wargaliso waalidiinta wixii ku saabsan sirta macluumaadka shaqsiga lagu aqoonsan karo, oo ay ku jiraan:

1. Sharaxaada heerka uu gaarsiisan yahay ogeysiiska lagu bixiyo afka hooyo ee kooxaha kala duwan ee dadweynaha ee jooga gudaha Gobolka;
2. Sharaxaada carruurta laga hayo macluumaadka shakhsi ahaan lagu aqoonsan karo, noocyada macluumaadka la raadinayo, hababka Dawladdu doonayso in ay u isticmaasho ururinta macluumaadka (oo ay ku jiraan ilaha xogta laga soo ururiyay), iyo isticmaalka loo adeegsan doono macluumaadka;
3. Soo koobida siyaasadaha iyo nidaamyada ay tahay in hay'adaha ka qaybqaata ay raacaan ee ku saabsan kaydinta, u shaacinta qolo saddexaad, haynta, iyo burburinta macluumaadka shaqsiga lagu aqoonsan karo; iyo:
4. Sharaxaad ku saabsan dhammaan xuquuqda waalidiinta iyo carruurta ee ku saabsan macluumaadkan, oo ay ku jiraan xuquuqaha hoos yimaada Xeerka Xuquuqda Waxbarashada Qoyska iyo Qarsoodiga (Family Educational Rights and Privacy Act, FERPA) iyo xeerarkeeda dhaqangelinta ee 34 CFR Qaybta 99.

Kahor wax kasta oo ah aqoonsi weyn, goob, ama hawsha qiimaynta (sidoo kale loo yaqaan "helitaanka ilmaha"), ogaysiis waa in lagu daabacaa ama lagu shaaciyaa wargeysyada ama warbaahinta kale, ama labadaba, oo leh wareeg ku filan in lagu ogeysiyo waalidiinta guud ahaan hawsha Gobolka si loo helo , aqoonsado, oona loo qiimeeyo carruurta u baahan waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha.

Xeerka 2365.2.1; 34 CFR §300.612

Xuquuqda Helitaanka

Dugsiga degmadaada ama ururkaaga kormeerka waa in ay kuu ogolaadaan inaad kormeerto oo aad dib u eegto diiwaano kasto oo waxbarasheed oo la xidhiidha ubadkaaga ee la soo ururiyay, la hayo, ama uu isticmaalo dugsiga degmadaada ama ururkaaga kormeerka sida hoos timaada Qaybta B ee IDEA iyo xeerarka waxbarashada gaarka ah ee gobolka. Dugsiga degmada ama ururka kormeerka waa in ay u hogaansamaan codsigaaga ah in aad kormeer iyo dib u eegist ku sameyso diwaano kastoo ku saabsan waxbarashada ubadkaaga iyada oo aan lagu sameynin dib u dhac aan loo baahnayn iyo ka hor kulan kasta oo khuseeya barnaamijka waxbarashada gaarka ah (individualized education program, IEP), ama dacwad dhageysi kasta oo cadaaladeed dhexdhexaad ah (oo ay ku jiraan kulan xal lagu raadinayo ama dacwad dhegeysiga ku saabsan anshaxa), iyo kiis kasta oo aan ka badnayn 45 maalmood ka dib markaad codsiga sameyso.

Xaqa aad u leedahay inaad kormeerto oo aadna dib u eegto diiwaanada waxbarashada waxa ka mid ah:

1. Xaqa aad u leedahay in aad jawaab ka hesho dugsiga degmadaada ama ururkaaga kormeerka oo ku aadan codsiyadaada macquulka ah ee u helida sharaxaado iyo fasiraado diiwaanada;
2. Xaqa aad u leedahay in aad codsato in dugsiga degmadaada ama ururkaaga kormeerka ay ku siiyaan koobiyada diiwaanka haddii aanad si wax ku ool ah u baadhin oo aad dib u eegis u samayn karin diiwaanada ilaa aad hesho nuqulladaas; iyo:
3. Xaqa aad u leedahay in wakiilkaagu uu kormeero oona dib u eego diiwaanada.

Dugsiga degmadu ama ururka kormeerku waxay u qaadan karaan inaad awood u leedahay inaad kormeerto oo aad dib u eegto diiwaanada la xidhiidha ilmahaaga haddii aysan ahayn in lagugula taliyo inaad awood u lahayn marka loo eego sharciga Gobolka ee lagu dabaqi karo arrimaha sida mas'uuliyadda, kala tagga iyo/ama furinka.

Xeerka 2365.2.2; 34 CFR §300.613

Diiwaanka Helitaanka

Dugsi degmadeed ama ururka kormeerka kasta waa in uu hayaa diiwaanka dhinacyada hela marin u helka diiwaanada waxbarasho ee lasoo ururiyay, la hayo, ama la isticmaalay sida hoos timaada Qaybta B ee IDEA iyo xeerarka waxbarashada gaarka ah ee gobolka (marka laga reebo helitaanka waalidiinta iyo shaqaalaha idman ee dugsiga degmadaada ama ururkaaga kormeerka) , oo ay ku jiraan magaca qoloda, taariikhda la siiyay marin u helka xogta, iyo ujeedada qoloda loo siiyay oggolaasha inee isticmaalaan diiwaannada.

Xeerka 2365.2.3; 34 CFR §300.614

Diiwaanada in Ka Badan Hal Ilmo

Haddii diiwaan kastoo waxbarashadeed ay ku qoran yihiin macluumaadka hal cunug ka badan, waalidiinta carruurtaas waxay xaq u leeyihiin inay kormeeraan oo ay dib u eegis ku sameeyaan kaliya macluumaadka la xiriira ilmahooda ama in lagu wargeliyo macluumaadkaas gaarka ah.

Xeerka 2365.2.4 34; CFR §300.615

Liiska Noocyada iyo Goobaha Macluumaadka

Marka codsiga la sameeyo, dugsi degmadeed ama urur kormeereed kasta waa in ay ku siiyaan liiska noocyada iyo goobaha laga heli karo diiwaanka waxbarashada ee la soo ururiyay, lagu hayo, ama ay isticmaasho wakaaladu.

Xeerka 2365.2.5 34; CFR §300.616

Khidmadaha

Dugsi degmadeed ama urur kormeereed kasta waxa laga yaabaa inay kaa qaadan kharash koobiyada diiwaanka laguugu sameeyay sida hoos timaada qawaaniinta waxbarashada gaarka ah ee federaalka iyo gobolka haddi khidmadaadu aanay si wax ku ool ah kaaga hor istaagin inaad isticmaasho xaqa aad u leedahay inaad kormeerto oo aadna dib u eegto diiwaanadaas.

Dugsiga degmada ama ururka kormeerka ayaa laga yaabaa ineysan kugu dalacin lacag si ay u raadiyaan ama dib u helaan macluumaadka hoos yimaada qodobadan.

Xeerka 2365.2.6 34; CFR §300.617

Wax ka Beddelka Diwaanada iyadoo ah Codsiga Waalidiinta

Haddii aad aaminsantahay in macluumaadka ku jira diiwaanka waxbarashada ee ku saabsan ilmahaaga ee la soo ururiyay, la hayo, ama la isticmaalo sida hoos timaada Qaybta B ee IDEA iyo shuruudca waxbarashada gaarka ah ee gobolka ay tahay mid aan sax ahayn, marin habaabin ah, ama ku xad-gudbeysa asturnaanta ama xuquuqaha kale ee ilmahaaga, waxaad ka codsan kartaa dugsiga degmada ama ururka kormeerka ee haya xogta ineey bedelaan macluumaadka.

Dugsiga degmada ama ururka kormeerka waa in ay go'aan ka gaadhaan in la beddelo macluumaadka si waafaqsan codsigaaga muddo macquul ah gudahooda marka la helo codsigaaga.

Haddii dugsiga degmadu ama ururka kormeerku ay diidaan inay beddelaan macluumaadka si waafaqsan codsigaaga, waa inay kugu wargeliyaan diidmada oo ay kugula taliyaan xaqa aad u leedahay dacwad dhegaysi ku aadan ujeedadan sida lagu sharraxay hoosta ciwaanka *Fursada Dacwad Dhagaysiga*.

Xeerka 2365.2.7 34; CFR §300.618

Fursada Dacwad Dhagaysiga

Dugsiga degmada ama ururka kormeerku waa in, haddii la codsado, ay ku siiyaan fursad dacwad dhegaysi si aad uga dooddo macluumaadka ku jira diiwaannada waxbarashada ee ku saabsan ilmahaaga si loo xaqiijiyo in aanay sax ahayn, marin habaabin yihiin, ama haddii kale ku xad-gudbayaan asturnaanta ama xuquuqaha kale ee ilmahaaga.

Xeerka 2365.2.8; 34 CFR §300.619

Habraacyada Dacwad Dhageysiga

Dacwad dhageysiga ka dhan ah macluumaadka ku jira diiwaannada waxbarashada waa in loo fuliyaa si waafaqsan nidaamka dhageysiyadaas oo kale sida hoos timaada Xeerka Xuquuqda Waxbarashada Qoyska iyo Qarsoodinimada (FERPA).

34 CFR §300.621

Natijada Dacwad Dhageysiga

Haddii, si ah natijada ka soo baxday dacwad dhageysiga, dugsiga degmada ama ururka kormeerka ay go'aansadaan in xogtu ay tahay mid aan sax ahayn, marin-habaabin ah, ama haddii kale ku xad-gudbaya sirta ama xuquuqaha kale ee ubadka, waa inay beddelaan macluumaadka si habboon oona si qoraal ah kugu wargeliyaan adiga.

Haddii, si ah natijada ka soo baxday dacwad dhageysiga, dugsiga degmada ama ururka kormeerka ay go'aansadaan in xogtu ay tahay mid aan sax ahayn, marin-habaabin ah, ama haddii kale ku xad-gudbaya sirta ama xuquuqaha kale ee ubadka, waa inay kugu wargeliyaan xaqa aad u leedahay inaad ku meeleyso diiwaanada in ay ku hayso ilmahaaga, bayaan ka faalloonaya macluumaadka ama bixinaya sabab kasta oo aad ku khilaafsan tahay go'aanka dugsiga degmada ama ururka kormeerka.

Sharaxaada noocaas oo kale ee lagu meeleyo diiwaanka ilmahaaga waa in:

1. In ay hayaan dugsiga degmadaada ama ururkaaga kormeerka si qayb ka mid ah diiwaanada ubadkaaga ilaa inta diiwaanka ama qaybta lagu muransan yahay ay hayso dugsiga degmadaada ama ururkaaga kormeerka; iyo:
2. Haddii dugsiga degmada ama ururka kormeerka ay u shaaciyaan diiwaanka ubadkaaga ama qaybta la isku haysto qolo kasto, sharraxaadda waa in sidoo kale loo bandhigaa qolodaas.

Xeerka 2365.2.9; 34 CFR §300.620

Oggolaanshaha Ku aadan Shaacinta Macluumaadka Shakhsi ahaan La Aqoonsan Karo

Marka laga reebo shaacinada loo oggolaaday sharci fulinta iyo mas'uuliyiinta garsoorka ee aan oggolaansho waalid looga baahnayn Xeerka Xuquuqda Waxbarashada Qoyska iyo Qarsoodiga (Family Educational Rights and Privacy Act, FERPA), oggolaanshahaaga waa in la helaa ka hor inta aan macluumaadka shakhsi ahaaneed ee lagu aqoonsan karo aan loo bandhigin dhinacyo aan ahayn mas'uuliyiinta hay'adaha ka qaybgalaya. . Marka laga reebo xaaladaha hoos ku xusan, oggolaanshahaaga looma baahna ka hor inta aan macluumaadka shakhsi ahaanta loo aqoonsan karo loo sii dayn saraakiisha wakaaladaha ka qaybqaata sabab ah ujeeddooyinka buuxinta shuruudaha Qaybta B ee IDEA iyo xeerarka waxbarashada gaarka ah ee gobolka.

Oggolaanshahaaga, ama oggolaanshahaaga ubadka xaqa u leh ee gaadhay da'da qaan-gaarka sida waafaqsan sharciga Gobolka, waa in la helaa ka hor inta aan macluumaadka shakhsiga lagu aqoonsan karo loo sii dayn saraakiisha hay'adaha ka qayb qaadanaya bixinta ama bixinta adeegyada xilliga kala-guurka.

Haddii ilmahaagu uu ku jiro, ama uu aadayo, dugsi madaxbannaan oo aan ku yaalliin isla dugsi degmada ama ururka kormeerka ee aad deggan tahay, oggolaanshahaaga waa in la helaa ka hor inta aan wax macluumaad ah oo shakhsi ahaan lagu aqoonsan karo ilmahaaga aysan isku shaacinin saraakiisha dugsi degmada ama ururka kormeerka ee uu ku yaalo dugsi degmada madaxa banaan iyo masuuliyiinta dugsi degmada ama ururka kormeerka ee meesha aad degan tahay.

Xeerka 2365.2.11; 34 CFR §300.622

Dhawritaanada

Dugsi degmadeed kasta ama ururka kormeerka waa inuu ilaaliyaa sirta macluumaadka shakhsi ahaanta lagu aqoonsan karo xilliyadiisa kala ah waqtiga ururinta, kaydinta, shaacinta, iyo burburintaba.

Hal mas'uul oo jooga dugsi degmadaada ama ka mid ah ururkaaga kormeerka waa inuu qaataa mas'uuliyadda uu ku xaqiijinayo sirta macluumaadka shaqsi ahaanta lagu aqoonsan karo.

Dugsi degmadeed ama urur kormeereed kasta waa inuu lahaadaa xeerar ama nidaamyada lagu hubinayo in dhammaan dadka ururinaya ama isticmaalaya macluumaadka shakhsi ahaanta lagu aqoonsan karo ay helaan tababar ama tilmaamo ku saabsan siyaasadaha iyo habraacyada Vermont ee hoos yimaada Qaybta B ee IDEA, Xeerka 2365.2.12 iyo Xeerka Xuquuqda Waxbarashada Qoyska iyo Qarsoodinimada (FERPA).

Dugsi degmadeed ama urur kormeereed kasta waa inuu hayaa, si ula jeedkeedu yahay kormeerka dadweynaha, liiska hadda ee magacyada iyo jagooyinka shaqaalaha hay'adda kuwaas oo heli kara macluumaadka shakhsi ahaanta lagu aqoonsan karo.

Xeerka 2365.2.12; 34 CFR §300.623

Burburinta Xogta

Dugsi degmadaada ama ururkaaga kormeerka waa in ay kugu wargeliyaan marka macluumaadka shakhsi ahaan lagu aqoonsan karo ee la soo ururiyey, la hayo, ama la isticmaalay aan loo sii baahnayn si loo siiyo adeegyada waxbarashada ilmahaaga.

Macluumaadka waa in lagu burburiyaa codsigaaga. Si kastaba ha ahaatee, diiwaanka joogtada ah ee magaca, ciwaanka, iyo telefoonka ilmahaaga, darajooyinkiisa/keeda, diiwaanka imaanshaha, fasalada uu soo xadiray ama ay soo xadirtay, heerka fasal ee uu bogay ama ay bogtay, iyo sanadka uu dhammeeyay waa la hayn karaa iyadoona aan lahayn wakhti cayiman.

Habraacyada Cabashada ee Vermont

Farqiga U dhaxeya Cabashada Dacwad Dhegeysiga Nidaam Cadaaladeedka iyo Habraacyada Cabashada Maamuleed

Xeerarka Qaybta B ee IDEA iyo Xeerarka Waxbarashada Gaarka ah ee Vermont ayaa dejinaya habraacyo gaar ah oo loogu talagalay cabashooyinka ka dhanka ah maamulka iyo cabashooyinka nidaam cadaaladeedka iyo dacwad dhageysiyada. Sida hoos lagu faahfaahiyay, shaqsi kasta ama urur kasta waxa uu xeraysan karo cabasho ka dhan ah maamulka oo uu ku eedaynayo ku xad-gudbida Shuruucda Qaybta B iyo Xeerarka Waxbarashada Gaarka ah ee Vermont ee dugsiga degmada ama ururka kormeerka, Wakaalada Waxbarashada Vermont, ama wakaalado kale oo dawladeed. Adiga ama dugsiga degmada ama ururka kormeerka oo keliya ayaa xerayn kara dacwad nidaam cadaalad ah oo ka dhan arrin kasta oo la xidhiidha soo jeedin ama diidmada ku aadan in la bilaabo ama la beddelo aqoonsiga, qiimaynta ama meelaynta waxbarasho ee ilmaha naafada ah, ama siinta hab ku habboon oo bilaash ah waxbarashada dadweynaha (FAPE) ilmaha. Iyadoo ay tahay in Xoghayaha Wakaalada Waxbarashada ee Vermont guud ahaan inuu ku xaliyo Cabashada Maamuleed gudaha 60-maalin taariikh jadwaleed, ilaa wakhtiga si sax ah loo kordhiyo, sarkaalka dacwad dhagaysiga nidaamka cadaaladeed waa inuu qabto/dhageysto cabashada ka dhanka ah nidaamka cadaalada (haddii aan lagu xalinin kulan xalineed ama dhex dhexaadin) uuna soo saaraa go'aan qoraal ah 45-maalmo gudahooda ka dib dhamaadka xilliga xallinta, sida lagu qeexay dukumeentigan hoos yimaada ciwaanka Habka Xallinta, ilaa sarkaalka dhageysanaya dacwad dhegaysigu bixiyo wakhti kordhin gaar ah asagoo eegaya codsigaaga ama codsiga dugsiga degmada ama ururkaaga kormeerka. Cabashada ka dhanka ah maamulka iyo cabashada nidaam cadaaladeedka, habraacyada xallinta iyo dacwad dhageysiyada ayaa si buuxda hoos loogu sifeeyay.

Habraacyada Cabashada Ka dhanka ah Maamulka

34 CFR §300.151

Guud ahaan

Cabashada ka dhanka ah maamulka oo qoran oona saxiixan waa in laga xareeystaa Xoghayaha Wakaaladda Waxbarashada ee Vermont oona koobi loo gudbiyaa dugsiga degmada ama ururka kormeerka ama hay'ad dadweyne oo u adeegaysa ilmaha.

Marka la helo Cabashada Maamulka, Xoghayaha Waxbarashada ee Vermont waa in uu magacaabaa baaraha cabashada si uu u sameeyo baaritaan. Baaraha cabashada waa in uu baaro caddaymaha loo soo bandhigay isaga oo ku hadlaya magaca qofka dacwoonaya iyo sidoo kale magaca dugsiga degmada, ururka kormeerka, ama hay'ad kale oo dadweyne. Iyadoo ah go'aan ka soo baxay baaraha cabashada, cabashada waxaa lagu baari karaa habka dib u eegista dukumeentiga, kulan, dacwad dhageysi, baaritaanka goobta ay hawsha ka dhacday, ama isku dar kasto oo kuwaas ah.

Baaraha cabashada ayaa siin doona cabashoodaha fursad uu ku soo gudbiyo macluumaad dheeraad ah, midkood si hadal ahaan ama qoraal ahaan ah, taas oo ku saabsan eedeymaha ku jira cabashada. Baaraha cabashada ayaa sidoo kale laga yaabaa inuu siiyo dugsiga degmada, ururka kormeerka, ama wakaalada kale ee dadweynaha fursad ay kaga jawaabaan soo jeedinta lagu xalinayo cabashada, ama, iyadoo adiga ogolaansho lagaa helaayo, fursad ay ku sameeyaan dhexdhexaadin ama siyaabo kale oo lagu xaliyo khilaafka.

Haddii dacwad dhageysi la qorsheeyo, baaraha cabashada waa inuu lahaadaa awoodaha iyo waajibaadka hoos ku xusan:

1. Sameeynta shirar ka hor dacwad dhegeysiga;
2. Sameeynta dacwad dhageysi kasta oo loo baahan karo;
3. U diyaarinta xaqiiqooyinka la soo jeediyay iyo gunaanadka sharciga ee loogu talagay go'aanka ee ay qaateen maamulka dacwad dhageysiga; iyo:
4. Awoodo iyo waajibaadyada kale ee ku xusan Xeerka Guddiga Waxbarashada Gobolka 1236.1.

In aan ka sokeynin 60 maalmood ka dib markii la helo cabashada, Xoghayaha Waxbarashada ee Vermont waa inuu soo saaraa go'aan qoraal ah.

Marka baaritaanka cabashadu ay go'aamiso in uu jiro ku xad-gudub shuruud federaal ama gobol sida hoos timaada IDEA, warbixinta baaritaanku waa in ay ka hadashaa sida loo saxayo xadgudubka, oo ay ku jirto wax kasta oo ka dhasha diidmada adeegyada, oo ayna ku jirto, sida ku habboon, tallaabo sixitaan oo ku habboon baahiyaha ilmaha, iyo sidoo kale bixinta mustaqbalka ee ku habboon adeegyada dhammaan carruurta naafada ah.

Wakhti kordhinada

Xadka wakhtiga lixdanka taariikh jadwaleedka ah waxa la kordhin karaa keliya haddii ay jiraan xaalado gaar ah oo khuseeya cabasho gaar ah, ama haddii dhinacyadu ku heshiiyaan in la kordhiyo wakhtiga dhexdhexaadinta.

Cabashooyinka ka dhanka ah maamulka iyo dacwad dhageysiga nidaam cadaaladeedka

Haddii cabasho qoraal ah la helo taas oo sidoo kale ah mawduuca dacwad dhageysiga nidaam cadaaladeedka sida lagu qeexay hoosta ciwaanka Xareynta Cabashada Habka Cadaalada leh, ama Cabashada ku aadan Maamulka ay ka kooban tahay arrimo badan, kuwaas oo mid ama in ka badan ay qayb ka yihiin dacwad dhegeysigaas, Wakaaladda Waxbarashada ee Vermont waa in ay dhinac iska dhigtaa cabashada maamulka, ama qayb kasta oo ka mid ah cabashada maamulka ee lagu qeexay gudha dacwad dhagaysiga nidaam cadaaladeedka ilaa uu dacwad dhagaysigu dhamaanayo. Arrin kasta oo ku saabsan cabashada maamulka ee aan ka mid ahayn dacwad dhageysiga nidaam cadaaladeedka waa in lagu xalliyaa iyadoo la adeegsanayo waqtiga xaddidan iyo nidaamyada kor lagu sharraxay.

Haddii arin lagu soo jeediyo cabasho horay loogu go'aamiyay cabashada nidaam cadaaladeedka oo ay ku lug leeyihiin isla dhinacyada, go'aanka dhagaysigu waa mid khuseeya arinkaas oo Wakaalada Waxbarashada Vermont waa in ay ku wargelisaa cabashada in go'aanka la qaban karo.

Cabashada ku eedeeynaysa dugsiga degmada ama hay'ad kale oo dadwayne inay ku guul darreysato inay hirgeliso go'aanka dhagaysiga nidaamka cadaaladeedka waa in ay xalliso Wakaalada Waxbarashada ee Vermont.

Xareynta Cabasho ka dhan ah Maamulka

Xeerka 2365.1.5 34 CFR§300.153

Guud ahaan

Qof ama hay'ad kasta ayaa xareysan karto cabasho maamul oo qoran oona saxiixan iyadoo la raacayo habraacyada kor lagu sharraxay.

Cabashada Maamulku waa inay ku jirtaa:

1. Bayaan sheegaya in dugsiga degmadeedka, ururka kormeerka ama wakaalado kale oo dadwayne ay ku xad gudbeen shuruuda Qaybta B ee IDEA ama xeerarkeeda;
2. Xaqiiqooyinka uu bayaanku ku saleysan yahay;
3. Saxiixa iyo macluumaadka lagala xidhiidhayo cabashoodaha; iyo Haddii lagu eedaynayo xadgudubyo ka dhan ah ilmo gaar ah:
 - a. Magaca iyo cinwaanka guriga uu deggan yahay ilmaha;
 - b. Magaca dugsiga uu ilmuhu dhigto;
 - c. Markey marxalladu tahay ilmo ama dhallinyaro guri la'aan ah (hoos imaada macnaha qaybta 725(2) ee Xeerka Caawimada Dadka Guri La'aanta ah ee McKinney-Vento (42 U.S.C. 11434a(2)), macluumaadka xidhiidhka ee la heli karo ee ilmaha, iyo magaca dugsiga cunuggu uu dhigto;
 - d. Sharaxaad ku saabsan nooca dhibaatada heysata ilmaha, oo ay ku jiraan xaqiiqooyinka la xidhiidha dhibaatada; iyo:
 - e. Xalinta loo soo jeediyay dhibaatada ilaa inta la og yahay oo ay heli karaan qolada wakhtiga cabashada la xareynayo.

Marka laga reebo cabashooyinka habraaca cadaalada leh ee lagu sheegay Xeerka 2365.1.6, cabashadu waa in ay sheegeyso eedeeyn xadgudub ah oo dhacay wax ka badan hal (1) sano ka hor taariikhda cabashada la helay sida kor lagu faahfaahiyay ee hoos timaada ciwaanka *Habraacyada Cabashada Ka dhanka ah Maamulka*.

Qeybta C cabashooyinka

Cabashada ka dhanka ah maamulka ayaa sidoo kale la xerayn karaa kuwaas oo ku saabsan qodobada Qaybta C ee IDEA. Baaritaanka cabashada Qaybta C waa in la dhamaystiraa iyadoo lala kaashanayo Wakaaladda Adeegyada Dadweynaha, Waaxda Carruurta iyo Qoysaska, [Qeybta Korriinka Ilmaha](#). Cabasho qoraal ah waa in loo soo diraa , [Adeegyada Isku-dhafan ee Ilmaha](#), Child Development Division, 280 State Drive, NOB 1 North, Waterbury, Vermont 05671-1040.

Habraacyada Cabashada Nidaam Cadaaladeedka

Xareynta Cabashada Nidaam Cadaaladeedka

34 CFR §300.507

Guud ahaan

Adiga ama dugsiga degmada ama ururka kormeerka ayaa xerayn kara dacwad nidaam cadaalad ah oo ka dhan arrin kasta oo la xidhiidha soo jeedin ama diidmada ku aadan in la bilaabo ama la beddelo aqoonsiga, qiimaynta ama meelaynta waxbarasho ee ilmahaada, ama siinta hab ku habboon oo bilaash ah waxbarashada dadweynaha (FAPE) ilmahaada.

Cabashada habraaca cadaaladeed waa in ay sheegto eedeeyn xadgudub ah oo dhacay wax aan ka badnayn laba (2) sano ka hor inta aan fayl-gareeyaha cabashadu ogaan ama ay ahayd in uu ogaado ficilka la sheegayo ee saldhiga u ah cabashada nidaamka cadaaladeed. Si kastaba ha ahaatee, haddii aad si keligiis

ah ilmahaaga u dhigtay dugsi madaxbannaan oo aad rabto in lagu soo celiyo, cabashada nidaamka cadaaladeed waa in lagu xereeyaa sagaashan (90) maalmood gudahooda kadib meelaynta.

Jadwalka sare kuma quseeyo haddii aadan ku xarayn karin cabashada nidaam cadaaladeedka gudaha wakhtiga la cayimay sababtoo ah:

1. Dugsiga degmada ama ururkaaga kormeerka ayaa si gaar ah oo khaldan u soo bandhigay in ay xalliyeen arrimaha lagu sheegay cabashada; ama:
2. Dugsi degmada ama ururkaaga kormeerka ayaa kaa reebtay xogta taas oo ka soo horjeeda sida looga baahnaa inay ku siiyaan sida hoos timaada Qaybta B ee IDEA iyo Xeerarka Waxbarashada Gaarka ah ee Vermont.

Macluumaadka loogu talagalyaalidiinta

Dugsiga degmadu ama ururka kormeerku waa in ay kugu wargaliyaan adeeg kasta oo bilaash ah ama qiimo jaban ah iyo adeegyo kale oo khuseeya oo laga heli karo aagga haddii aad codsato macluumaadka, ama haddii adiga ama dugsigaaga degmada ama ururkaaga kormeerka aad xeraysataan cabashada nidaam cadaaladeedka.

Cabashada Nidaam Cadaaladeedka

Xeerka 2365.1.6; 34 CFR §300.508

Guud ahaan

Si aad u codsato dacwad dhageysi, adiga ama dugsiga degmada ama ururka kormeerka (ama qareenkaaga ama qareenka dugsiga degmada ama ururka kormeerka) waa inaad u gudbisaa ama uu u gudbiyaa cabashada nidaamka cadaaladeed qolada kale. Cabashadaasi waa inay ka kooban tahay dhammaan waxyaabaha hoos ku taxan waana inay ahaato mid sir ah.

Adiga ama dugsiga degmada ama ururka kormeerka, midkii uun soo xareeyay cabashada, waa inaad sidoo kale siisaa ama uu siiyaa Wakaalada Waxbarashada ee Vermont koobiga cabashada doo isticmaalaya foomka uu bixiyay Xoghayaha.

Nuxurka cabashada

Cabashada nidaam cadaaladeedka waa in ay ku jiraan:

1. Magaca ilmaha;
2. Cinwaanka guriga ama meesha uu ilmahu degan yahay;
3. Magaca dugsiga ilmaha;
4. Haddii ilmuhu yahay ilmo ama dhalinyaro guri la'aan ah, bixi macluumaadka xiriirka ilmaha iyo magaca dugsiga ee ilmaha;
5. Sharaxaad ku saabsan nooca dhibaatada ilmaha ee la xiriirta tallaabada la soo jeediyay ama la diiday, oo ay ku jiraan xaqiiqooyinka la xiriira dhibaatada; iyo:
6. Xallinta la soo jeediyay ee dhibaatada ilaa xadka la ogyahay oona diyaarka u ah adiga ama dugsiga degmada ama ururka kormeerka wakhtigaas.

Ogeysiiska loogu baahan yahay ka hor dacwad dhageysiga cabashada nidaam cadaaladeedka

Adiga ama dugsiga degmada ama ururka kormeerka waxaa laga yaabaa iniidan lahaanin dacwad dhagaysi ilaa adiga ama dugsiga degmadu ama ururka kormeerku (ama qareenkaaga ama qareenka

dugsiga degmada ama ururka kormeerka), aad xeraysato ama ay xareystaan cabashada nidaam cadaaladeedka oo ayna ku jirto macluumaadka kor lagu qoray.

Filnaanshaha cabashada

Si cabashada nidaamka cadaaladeed ay horay ugu socoto, waa in loo arkaa mid filnaan leh. Cabashada nidaam cadaaladeedka ayaa loo tixgalin doonaa mid filnaan leh (inay buuxisay shuruudaha kor ku xusan) haddii aysan ahayn in kooxda helaya cabashada nidaam cadaaladeedka (adiga ama dugsiga degmada ama ururka kormeerka) ay qoraal ku ogeysiyaan sarkaalka dacwad dhagaysiga iyo qolada kale, 15 maalmood gudahood kadib helitaanka cabashada, in qolyaha helaya ay aaminsan yihiin in cabashada nidaamka cadaaladeed aysan buuxin shuruudaha kor ku xusan.

Shan maalmo taariikh jadwaleed gudahooda marka la helo wargelinta ah in qolyaha helaya (adiga ama dugsiga degmada ama ururka kormeerka) ay u arkaan in aysan cabashada nidaam cadaaladeedka ahayn mid filnaansho leh, sarkaalka dacwad dhagaysigu qaadaya waa in uu go'aamiyo haddii cabashada nidaam cadaaladeedka ay buuxisay shuruudaha kor ku xusan, oo uuna ku ogaysiiyo adiga iyo dugsiga degmada ama ururkaaga kormeerka qoraal ahaan isla markiiba.

Wax ka beddelka cabashada

Adiga ama dugsiga degmada ama ururka kormeerka waxaad samayn kartaan wax ka beddelka cabashada kaliya haddii:

1. Qolada kale ay ku ansixiyaan si qoraal ah oona la siiyo fursad ay ku xaliyaan cabashada nidaamka cadaaladeed iyada oo loo marayo kulan xalineed ah, hoos ayaa lagu sharaxay; ama:
2. Wakhti aan ka danbeynin shan maalmood ka hor intaysan bilaabmin dhagaysiga nidaamka cadaaladeed, sarkaalka sameenaya dacwad dhagaysiga waxa uu fasaxayaa oggolaanshaha lagu sameenayo isbedelada.

Haddii kooxda cabaneysa (adiga ama dugsiga degmada ama ururkaaga kormeerka) ay isbedel ku sameeyaan cabashada nidaam cadaaladeedka, waqtiyada kulanka xallinta (15 maalmood gudahooda marka la helo cabashada) iyo wakhtiga xallinta (30 maalmood gudahooda kadib helitaanka cabashada) dib u bilaabato taariikhda cabashada wax laga bedelay la xareeyay.

Jawaab-celinta dugsiga degmada ama ururka kormeerka ee ku aadan cabashada nidaam cadaaladeedka

Haddii dugsiga degmadu ama ururka kormeerku aanay kuu soo dirin ogaysiis hore oo qoraal ah, sida lagu qeexay ciwaanka Ogeysiiska Horay Loo Qoray, ee ku saabsan mawduuca ku jira cabashada nidaamka cadaaladeed, dugsiga degmadu ama ururka kormeerku waa in, 10 maalmood gudahooda kadib helitaanka cabashada nidaam cadaaladeedka, ayaa kuu soo diraan jawaab ay ku jiraan:

1. Sharaxaada ku saabsan sababta dugsiga degmadu ama ururka kormeerku ay u soo jeediyeen ama u diideen inay qaadaan tallaabada lagu soo qaaday cabashada nidaamka cadaaladeed;
2. Sharaxaada ku saabsan xulashooyinka kale ee kooxda barnaamijka waxbarashada gaarka ah ee ilmahaaga (IEP) ay tixgeliyeen iyo sababaha doorashooyinkaas loo diiday;
3. Sharaxaada habraaca indho-indheyn, qiimayn, diiwaan, ama warbixin kasta oo uu dugsiga degmadu ama ururka kormeerku u isticmaalay si gundhig ugu ah tallaabada la soo jeediyay ama la diiday; iyo:
4. Sharaxaada ku saabsan arrimaha kale ee khuseeya dugsiga degmada ama ururka kormeerka ee tallabada la soo jeediyay ama la diiday.

Bixinta macluumaadka ku jira shayada 1-4 ee sare kama hortagayso in dugsiga degmadu ama ururka kormeerku caddeeyaan in cabashada nidaam cadaaladeed aysan ahayn mid filnaansho leh.

Jawaab-celinta qolada kale ee ku aadan cabashada nidaam cadaaladeedka

Marka laga reebo sida lagu sheegay ciwaan-hoosaad sida ugu dhaw kor ah, *jawaab-celinta dugsiga degmada ama ururka kormeerka ee ku aadan cabashada nidaam cadaaladeedka*, kooxda helaysa cabashada nidaam cadaaladeedka waa in, 10 maalmo taariikh jawaleed gudahooda laga bilaabo taariikhda helitaanka cabashada, u soo diraan dhinaca kale jawaab si gaar ah u qeexaysa arimaha kujiraan gudaha dacwada.

Foomamka Moodada

Wakaalada Waxbarashada ee Vermont waxay haysaa moodayaal foomam si ay kaaga caawiyaan xeraynta cabashada nidaam cadaaladeedka iyo cabashada ka dhanka ah maamulka. Si kastaba ha ahaatee, Gobolkaaga ama dugsiga degmadaada ama ururkaaga kormeerka lagama yaabo in ay kaaga baahdaan inaad isticmaasho foomamkan moodada ah. Dhab ahaantii, waxaad isticmaali kartaa foomkan ama moodo foom kale ah oo habboon, ilaa inta uu ka kooban yahay macluumaadka loo baahan yahay ee ku aadan xareynta cabashada nidaamka cadaaladeed ama cabashada ka dhanka ah maamulka.

- Cabashada nidaamka cadaaladeed: [loogu talagalay waalidiinta](#)
- Cabashada nidaamka cadaaladeed: [loogu talagalay dugsiyada degmooyinka](#)
- [Foomka cabashada ka dhanka ah maamulka](#)

34 CFR §300.509

Dhexdhaxaadinta

Xeerka 2365.1.4; 34 CFR §300.506

Guud ahaan

Dugsiga degmada ama ururka kormeerka waa in ay ka dhigaan dhex dhexaadin mid diyaar ah si ay ugu ogolaadaan adiga iyo dugsiga degmada ama ururka kormeerka si aad u xalisaan khilaafyada ku lug leh arin kasta oo hoos imaata Qaybta B ee IDEA, oo ay ku jiraan arimaha soo ifbaxay ka hor xeraynta cabashada nidaam cadaaladeedka. Haddaba, dhexdhaxaadintu waxay diyaar u tahay in lagu xalliyo khilaafaadka hoos imaada Qaybta B ee IDEA haddii aad gudbisay dacwad nidaam cadaalad ah iyo haddii kaleba si aad u codsato dacwad dhegaysiga nidaam cadaaladeed sida lagu qeexay hoosta ciwaanka Xareynta Cabashada Nidaam Cadaaladeedka.

Waxyaabaha loo baahan yahay

Habraacyadu waa inay xaqiijiyaan in habka dhexdhaxaadinta yahay:

1. Mid ikhtiyaari ka ah dhinacaaga iyo dhinaca dugsiga degmadaada ama ururkaaga kormeerka;
2. Mid aan loo isticmaalin in lagu diido ama lagu daahiyo xaqa aad u leedahay dacwad dhageysiga nidaam cadaaladeedka, ama in lagu diido xuquuq kasta oo kale oo aad leedahay sida hoos imaata IDEA iyo Xeerarka Waxbarashada Gaarka ah ee Vermont; iyo:
3. In uu qabtay dhexdhexaadiye aqoon leh oo aan eex lahayn kaas oo loo tababaray farsamooyin dhexdhexaadiineed oo waxtar leh.

Wakaaladda Waxbarashada ee Vermont waxay haysaa liis ay ku qoran yihiin dad aqoon u leh oo dhexdhexaadiyayaal ah oo yaqaana sharciyada iyo xeerarka la xidhiidha bixinta waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha.

Wakaaladda Waxbarashada ee Vermont ayaa mas'uul ka ah kharashka lagu bixinaayo habka dhexdhexaadinta, oo ay ku jiraan kharashyada shirarka.

Kulan kasta oo ka mid ah habka dhexdhexaadinta waa in lagu qabtaa waqti ku habboon oona lagu qabtaa meel ku habboon adiga iyo dugsiga degmada ama ururka kormeerka.

Haddii adiga iyo dugsiga degmada ama ururka kormeerka aad ku xalisaan khilaafka habka dhexdhexaadinta, labadiina dhinacba waa in aad gashaan heshiis sharci ah oo qeexaya xallinta oona:

1. Qeexaya in dhammaan wada-hadallada dhacay intii lagu jiray hannaanka dhexdhexaadinta ay ahaan doonaan kuwo sir ah oo aan loo isticmaali karin caddayn ahaan gudaha dacwad kasta oo xigta oo nidaam cadaaladeed ah ama dacwad madani ah; oo:
2. Ayna saxiixaan labadiinaba adiga iyo wakiilka dugsiga degmada ama ururka kormeerka kaasoo awood u leh inuu u gaaro go'aan kama danbeys ah asagoo/iyadoo metalaya dugsiga degmada ama ururka kormeerka.

Heshiis dhexdhexaadin oo qoran, saxiixan waa mid laga dhaqan gelin karo maxkamad kasta ee Dawlad goboleed oo awood u leh iney sidaas sameeyso (maxkamad awood u leh sida uu dhigayo sharciga gobolka si ay u dhegeysato kiiskan nooacan ah) ama maxkamad degmadeed Maraykanka ah.

Wadahadalada dhacay intii lagu jiray habka dhexdhexaadinta waa inay ahaadaan kuwo qarsoodi ah. Looma isticmaali karo caddayn ahaan gudaha dacwad dhegaysi kasta oo mustaqbalka dhacda ama dacwad madani ah oo ka dhacda maxkamad federaali ah ama maxkamadda Gobolka ee dawlad-goboleedka u helaya caawinaad sida hoos timaada Qaybta B ee IDEA iyo Xeerarka Waxbarashada Gaarka ah ee Vermont.

Codsiyada la qoray ee loogu talagaly dhexdhexaadinta waa in loo soo gudbiyaa iyadoo la isticmaalayo [Foomka Codsashada Dhexdhexaadinta Lagu Xallinaayo Khilaafaadka](#), Wakaalada Waxbarashada ee Vermont, Adeegga Dhexdhexaadinta ee Waxbarashada Gaarka ah, 1 National Life Drive, Davis 5, Montpelier, VT 05620-2501.

Marka la helo codsiga noocaas ah, shaqaalaha Wakaaladdu waxay kuugu soo diri doonaan Xuquuqda Waalidka gudaha Ogeysiiska Waxbarashada Gaarka ah waxayna u diri doonaan habraacyadeeda dhexdhexaadinta dhammaan dhinacyada ay ka dhex dhaceeyso dhexdhexaadinta. Heshiiska dhexdhexaadinta waa inuu ku qornaadaa qoraal ahaan foom uu ansixiyay Xoghayaha Waxbarashada ee Vermont oo ayna saxiixeen dhammaan dhinacyada. Haddii codsigu aanu qoraal ahaan karin duruufo gaar ah dartood, sida awood la'aanta in isgaarsiin lagu sameeyo qoraal ahaan, codsiga waxa lagu samayn karaa hab kale oo isgaarsiineed.

Eex la'aanta dhexdhexaadiyaha

Dhexdhexaadiyaha:

1. Ma noqon karo shaqaale ka tirsan Wakaalada Waxbarashada ee Vermont ama dugsiga degmada ama ururka kormeerka ee ku lug leh waxbarashada ama daryeelka ubadkaaga; iyo:
2. Waa in aanu lahayn dano shaqsi ama mid xirfadeed taas oo ka hor imanaysa ujeeddada dhexdhexaadiyaha.

Qofka si kale ugu qalma dhexdhexaadiye maaha shaqaalaha dugsiga degmada ama ururka kormeerka ama Wakaalada Waxbarashada Vermont oo keliya sababtoo ah isaga ama iyada waxaa kharash siinayo Wakaalada, ama dugsiga degmada ama ururka kormeerka si uu ugu ugu adeego dhexdhexaadiye ahaan.

Meelaynta ilmaha iyadoo Markaa Cabashada iyo Dacwad Dhageysiga Nidaam Cadaaladeedka La sugayo

Marka laga reebo sida hoos lagu xusay ee hoos timaada cinwaanka *Habraacyada Marka La Anshax-marinayo Carruurta Naafada ah*, marka cabashada nidaam cadaaladeedka ah loo diro dhinaca kale, inta lagu jiro muddada nidaamka xallinta, iyo inta aad sugayso go'aanka dacwad dhageysi kasta oo cadaalad ah ama dacwad maxkamadeed, haddii aysan ahayn in adiga iyo dugsiga degmada ama ururka kormeerka aad ku heshihsaan haddii kale, ilmahaagu waa inuu ku sii jiraa meelayntiisa waxbarasho ee haddeer.

Haddii cabashada nidaam cadaaladeedka ay ku lug leedahay codsiga qaabilaada hore ee dugsiga dadweynaha, ilmahaagu, iyadoona markaa adiga oggolaansho lagaa heysto, waa in lagu meeleeeyaa barnaamijka caadiga ah ee dugsiga dadweynaha ilaa laga dhammeeyo dhammaan dacwadahaas.

Haddi go'aanka sarkaalka dacwad dhagaysiga ee cabashada nidaam cadaaladeedka uu ku waafaqo waalidka ilmaha in bedelka meelayntu ay haboontahay, meelayntaas waxa loola dhaqmayaa sidii heshiis u dhexeeya dugsiga degmada ama ururkaaga kormeerka iyo adiga.

Haddii cabashada nidaam cadaaladeedka ay ku lug leedahay codsiga adeegyada hore ee hoos yimaada Qeybta B ee IDEA iyo Xeerarka Waxbarashada Gaarka ah ee Vermont ee ubadka ka gudbaya in lagu adeego sida hoos timaada Qeybta C ee IDEA una gudbaya Qeybta B ee IDEA iyo Xeerarka Waxbarashada Gaarka ah ee Vermont Uma qalmo adeegyada Qaybta C sababtoo ah ilmuhu wuu saddex jirsaday, dugsiga degmadu ama ururka kormeerka loogama baahna inay bixiyaan adeegyada Qaybta C ee ubadku helayay. Haddii ilmaha la ogaado inuu u qalmo sida hoos timaada Qaybta B ee IDEA iyo Xeerarka Waxbarashada Gaarka ah ee Vermont oo aad bixisay oggolaanshah inuu ilmuhu helo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha markii ugu horeysay, ka dib, inta la sugayo natiijada dacwadda, dugsiga degmadu ama ururka kormeerku waa in uu siiyaa waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha ee aan lagu muransanayn (kuwa adiga iyo dugsiga degmada ama ururkaaga kormeerka labadiinuba aad ku heshihsaan).

Xeerka 2365.1.11; 34 CFR §300.518

Habka Xallinta

Xeerka 2365.1.6.8; 34 CFR §300.510

Kulanka Xallinta

Gudaha 15 maalmood markaad hesho ogaysiiska cabashadaada, iyo ka hor intaysan bilaabmin dhagaysiga dacwada, dugsiga degmada ama ururka kormeerka waa inay kula shiraan adiga iyo xubinta ay khusayso ama xubnaha Kooxda barnaamijka waxbarashada gaarka ah (IEP) kuwaas oo leh aqoon gaar ah oo ku saabsan xaqiiqooyinka lagu aqoonsaday cabashadaada nidaam cadaaladeedka. Shirka:

1. Waa in lagu daraa wakiilka dugsiga degmadaada ama ururkaaga kormeerka kaas oo leh awooda go'aan samaynta isagoo matalaya dugsiga degmada ama ururka kormeerka; iyo:
2. Waxaana laga yaabaa in aan lagu darin qareenka dugsiga degmada ama ururka kormeerka haddii aysan ahayn inuu kula socdo qareen.

Adiga iyo dugsiga degmada ama ururka kormeerka ayaa go'aaminaya xubnaha ay khusayso ee kooxda IEP inay ka soo qaybgalaan kulanka.

Ujeedada shirku waa in aad ka hadasho cabashadaada nidaam cadaaladeedka, iyo xaqiiqooyinka aasaaska u ah cabashada, si dugsiga degmada ama ururka kormeerku ay u helaan fursad ay ku xaliyaan khilaafka.

Kulanka xalinta looma baahna haddii:

1. Adiga iyo dugsigaaga degmada ama ururkaaga kormeerka aad ku heshiisaan qoraal ahaan inaad ka tanasushaan kulanka; ama:
2. Adiga iyo dugsiga degmada ama ururka kormeerka aad ku heshiisaan inaad isticmaashaan habka dhexdhexaadinta, sida lagu qeexay ciwaanka *Dhexdhexaadinta*.

Muddada xallinta

Haddi dugsiga degmada ama ururka kormeerka ay xalin waayaan cabashada nidaamka cadaalada leh si aad ugu qanacdo 30 maalmood gudahooda laga bilaabo maalinta la helo cabashada nidaam cadaaladeedka (inta lagu guda jiro mudada habka xalinta), dacwad dhageysiga nidaam cadaaleedka ayaa dhici kara.

Jadwalka 45-ka maalmood ee taariikh jadwaleedka ee loogu talagalay in lagu soo saaro go'aanka kama dambaysta ah wuxuu bilaabmayaa dhammaadka 30-ka maalmood ee muddada xallinta, iyada oo laga reebo qaar ka mid ah hagaajinta lagu sameeyay muddada xallinta 30-maalin ee taariikh jadwaleedka, sida hoos lagu sharraxay.

Marka laga reebo halka adiga iyo dugsiga degmada ama ururka kormeerka aad labadiinuba ku heshiiseen inaad ka tanaasulaan nidaamka xallinta ama isticmaalka dhexdhexaadinta, guuldaradaada inaad ka qaybgasho kulanka xallinta waxay dib u dhigi doontaa waqtiyada habka xallinta iyo dacwad dhageysiga nidaam cadaaleedka ilaa aad ogolaato inaad ka qaybgasho kulanka.

Haddii ka dib markii la sameeyo dadaallo macquul ah oona la diiwaangeliyo dadaalladaas, dugsiga degmada ama ururka kormeerka ma awoodaan inay helaan ka qaybgalkaaga ku aadan kulanka xallinta, dugsiga degmada ama ururka kormeerka ayaa laga yaabaa, dhammaadka 30-ka maalmood ee muddada xallinta, iney codsadaan in sarkaalka qabanaya dacwad dhegeysiga uu iska tuuro cabashadaada nidaam cadaaladeedka. Dukumeentiyeeynta dadaalladaas oo kale waa in ay ku jiraan diiwaanka dugsiga degmada ama ururka kormeerka ee ku aadan isku dayga ay ku diyaarinayaan wakhti iyo goob la isku raacsan yahay, sida:

1. Diiwaano faahfaahsan oo wicitaanada taleefoonka ah ee la sameeyay ama la isku dayay iyo natiiyooyinka wicitaanadaas; Nuqullada waraaqaha lagu soo diray iyo wixii jawaabo ah ee lagaa helay; iyo:
2. Warbixin faahfaahsan oo ku saabsan booqashooyinka gurigaaga ama goobta shaqada iyo natiiyooyinka booqashooyinkaas.

Haddii dugsiga degmada ama ururka kormeerka ay ku guuldareystaan inay ku qabtaan shirka xallinta 15 maalmood gudahooda laga bilaabo helitaanka ogaysiiska cabashadaada nidaamka cadaaladeed ama ay ku guuldareystaan inay ka qaybgalaan kulanka xallinta, waxaad weydiisan kartaa sarkaalka dacwad dhegeysiga inuu amro bilaabashada wakhtiga 45-ka maalin ee taariikh jadwaleedka ee dacwad dhagaysiga nidaam cadaaleedka.

Wax ka yara beddelka ama hagaajinta muddada xallinta 30-maalmood ee taariikh jadwaleedka

Haddii adiga iyo dugsiga degmada ama ururka kormeerka aad ku heshiisaan qoraal inaad ka tanaasushaan kulanka xallinta, intaa ka dib 45-ka maalmood ee taariikh jadwaleedka ee dacwad dhageysiga nidaam cadaaleedka wuxuu bilaabmayaa maalinta xigta.

Bilaabashada dhexdhexaadinta kadib ama kulanka xallinta iyo ka hor dhamaadka 30-ka maalmood ee wakhtiga xallinta, haddii adiga iyo dugsiga degmada ama ururka kormeerka aad ku heshiisaan qoraal inaanu heshiis suurtoagal ahayn, markaas 45-ka maalmood ee taariikh jadwaleedka ee dacwad dhageysiga nidaam cadaaladeed ayaa bilaabmayaa maalinta xigta.

Haddii adiga iyo dugsiga degmada ama ururka kormeerka aad ku heshiisaan inaad isticmaashaan habka dhexdhexaadinta, dhammaadka 30-ka maalmood ee muddada xallinta, labada dhinacba waxay ku heshiin karaan qoraal inay sii wadaan dhexdhexaadinta ilaa heshiis laga gaaro. Si kastaba ha ahaatee, haddii midkiin adiga ama ddugsiga degmada ama ururka kormeerka aad ka baxdaan habka dhexdhexaadinta, markaas 45-ka maalmood ee taariikh jadwaleedka ee dacwad dhageysiga nidaam cadaaleedka wuxuu bilaabmayaa maalinta xigta.

Heshiis dejinta qoran

Haddii xal laga gaadho khilaafka gudaha shirka xallinta, adiga iyo dugsiga degmada ama ururka kormeerka waa inaad gashaan heshiis sharci ah oo fulinaya kaas oo:

1. Uu saxiixday adiga iyo wakiilka dugsiga degmadaada ama ururkaaga kormeerka kaas oo awood u leh inuu go'aan kama danbeys ah u gaadho dugsiga degmadaada ama ururkaaga kormeerka; iyo:
2. Laga dhaqan gelin karo maxkamad Goboleed kasta oo awood u leh (maxkamad Gobol oo awood u leh inay dhegeysato kiiskan) ama maxkamadda degmada ee Mareykanka.

Muddada dib u eegista heshiiska

Haddii adiga iyo dugsiga degmada ama ururka kormeerka aad heshiis gaadhaan sabab ka dhalatay natiijada kulanka xallinta awgiis, midkood labada dhinacba (adiga ama dugsiga degmada ama ururka kormeerka) waxa laga yaabaa in ay heshiiska ku buriyaan saddex maalmood oo shaqo gudahooda laga soo bilaabo wakhtiga adiga iyo dugsigaaga degmada ama ururkaaga kormeerka labadiinaba aad saxiixdeen heshiiska.

Dacwad Dhegeysiga Cabashooyinka Nidaam Cadaaladeedka

Dacwad dhegeysiga Nidaam Cadaaleedka Eexla'aanta ah

Mar kasta oo dacwad dhageysiga nidaam cadaaleedka la xareeyo, adiga ama dugsiga degmada ama ururka kormeerka ee ku lug leh khilaafka waa inaad haysataan fursad dacwad dhageysi cadaalad ah oo eex la'aan ah, sida lagu qeexay *Habka Cabashada Nidaam Cadaaleedka iyo Xallinta*. Wakaaladda Waxbarashadda ee Vermont ayaa mas'uul ka ah qabashada dacwo dhageysiyada nidaam cadaaleedka.

34 CFR §300.511

Sarkaalka Dacwad Dhegeysiga ee Eex La'aanta ah

Ugu yaraan, sarkaalka dacwad dhegeysiga:

1. Waa inuusan noqon shaqaale ka tirsan Wakaalada Waxbarashada ee Vermont ama dugsiga degmada ama ururka kormeerka ee sida tooska ah ugu lug leh waxbarashada ama daryeelka ubadka. Si kastaba ha ahaatee, qofku maaha shaqaale ka tirsan wakaaladda oo keliya sababtoo ah isaga/iyada waxaa kharashka siinaya wakaalada si uu ugu adeego ka ahaan sarkaal dacwad dhegeysi;
2. Waa in aanu lahayn dan shakhsi ama mid xirfadeed oo khilaafaya ujeeddada sarkaalka dacwad dhegaysiga ee dacwada;
3. Waa inuu noqdaa qareen shati haysta;
4. Waa inuu ahaado mid aqoon leh oo fahma qodobada IDEA, iyo xeerarka Federaalka iyo Gobolka ee khuseeya IDEA, iyo fasiraada sharciga ah ee IDEA ee Maxkamadaha Federaalka iyo Gobolka; iyo:
5. Waa in uu leeyahay aqoonta iyo kartida uu ku qabanayo dacwad dhageysiga, iyo in uu sameeyn karo oona uu qori karo go'aamo, waafaqsan ku-dhaqanka sharciga caadiga ah.

Wakaaladda Waxbarashadda ee Vermont ayaa hayn doonta liiska dadka ugu shaqeeya sida saraakiisha dacwad dhegeysiga oo ay ku jiraan bayaan ku saabsan shahaadooyinka sarkaal kasta oo dacwad dhegeyste ah.

Xeerka 2365.1.7

Mawduuca dacwad dhagaysiga nidaam cadaaladeedka

Kooxda (adiga ama dugsiga degmada ama ururka kormeerka) ee codsada dacwad dhagaysiga nidaam cadaaleedka ayaa laga yaabaa in aanay ku soo qaadin arrimaha dacwad dhagaysiga nidaam cadaaleedka oo aan lagu soo hadal qaadin gudaha cabashada nidaam cadaaladeedka haddii aysan ka ahayn in qolada kale oggolaato.

Wakhti jadwaleedka codsashada dacwad dhageysi

Adiga ama dugsiga degmada ama ururka kormeerka waa in aad codsataan dacwad dhageysiga eex la'aanta ah oo ku saabsan cabashada nidaam cadaaleedka laba (2) sano gudahooda laga bilaabo taariikhda adiga ama dugsiga degmada ama ururka kormeerka aad ogaateen ama ay ahayd inaad wax ka ogaataan arinta ku saabsan cabashada. Haddii aad raadinayso magdhawga kharashaadka kaaga baxay meelaynta waxbarashada gaarka ah, waa inaad ku soo xeraysataa cabashada nidaamka cadaaladeed sagaashan (90) maalmood gudahooda kadib meelaynta halka dhinac ah.

Ka reebitaanada wakhti jadwaleedka

Jadwalka sare kuma quseeyo haddii aadan xarayn karin cabashada nidaam cadaaladeedka sababtoo ah:

1. Dugsi degmadeedka ama ururka kormeerka ayaa si gaar ah u soo bandhigay si khaldan shegeena inay xalliyeen dhibkii ama arrinta aad ku soo bandhigtay cabashadaada; ama:
2. Dugsi degmada ama ururka kormeerka ayaa kaa reebtay xogta taas oo ka soo horjeeda sida looga baahnaa inay ku siiyaan sida hoos timaada Qaybta B ee IDEA iyo Xeerarka Waxbarashada Gaarka ah ee Vermont.

Xuquuqaha Dacwad Dhageysiga

Xeerka 2365.1.6.15; 34 CFR §300.512

Guud ahaan

Koox kasta oo ka mid ah dacwad dhagaysiga nidaamka cadaalada leh (oo ay ku jirto dacwad dhageysiga la xiriirta habraacyada anshax-marinta) waxay xaq u leeyihiin:

1. In uu la socdo oo uuna la taliyo qareen iyo/ama dadka aqoon ama tababar gaar ah leh taasoo ku saabsan dhibaatooyinka carruurta naafada ah;
2. Ineey soo bandhigaan caddaynta oo ayna ka hor imaadan, su'aalo waydiiyaan, u baahdaana imaanshaha markhaatiyada; Mamnuucida soo bandhigida wax cadeymo ah oo ku saabsan dacwad dhegeysiga ee aan loo sheegin kooxdaas ugu yaraan shan maalmood oo shaqo ka hor wakhtiga dacwad dhegeysiga;
3. Helaan qoraal, ama, iyadoo ah ikhtiyaarkaaga, si elegtaroonig ah, qoraal-ereyba-erey ah oo ku saabsan dacwad dhegeysiga; iyo:
4. Helaan qoraal, ama, iyadoo ah ikhtiyaarkaaga, natiijooyinka elektarooniga ah ee ku saabsan xaqiiqada iyo go'aamada.

Shaacinta dheeraadka ah ee macluumaadka

Ugu yaraan shan maalmood oo shaqo ka hor dacwad dhegeysiga nidaam cadaaleedka, adiga iyo dugsiga degmada ama ururka kormeerka waa in aad isu sheegtaan dhammaan qiimayntii la dhammaystiray taariikhdaas iyo talooyinka ku salaysan qiimaynaha aad adiga ama dugsiga degmada ama ururka kormeerka aad dooneysaan inaad ku isticmaasaan dacwad dhegeysiga.

Sarkaalka dacwad dhegeysiga ayaa laga yaabaa inuu ka hortago dhinac kasta oo ku guuldareysta inuu u hoggaansamo shuruudahan inuu soo bandhigo qiimeynta ama talada la xiriirta dacwad dhageysiga iyadoon oggolaansho laga helin dhinaca kale.

Xuquuqda waalidka ee marka la joogo goobta dacwad dhageysiga

Waalidiinta ku lug leh dacwad dhageysiga waxay xaq u leeyihiin:

1. Ilmahaaga ka yeesho mid jooga goobta;
2. U furida dacwad dhegeysiga dadweynaha; iyo:
3. Haysto diiwaanka dacwad dhageysiga, natiijooyinka ka soo baxay xaqiiqda raadinta iyo go'aamada la soo sooray si bilaash ugu ah waalidiinta.

Go'aamada Dacwad Dhageysiga

Go'aanka Sarkaalka Dacwad Dhageysiga Qaadaya

Go'aanka sarkaalka dacwad dhegeysiga qaadaya ee ku saabsan haddii ilmahaagu helay waxbarasho dadweyne oo bilaash ah oo habboon

(FAPE) waa in lagu saleeyaa sababo la taaban karo.

Arrimaha lagu eedaynayo xadgudubka ka dhanka ah habraaca, sarkaalka dacwad dhegaysiga ayaa laga yaabaa inuu ogaado in ilmahaagu aanu helin FAPE kaliya haddii ay ku filnaan la'aanshaha habraaceed:

1. Ay farageliyeen xaqa ubadkaagu u leeyahay waxbarashada guud ee ku haboon eena bilaashka ah (FAPE);
2. Si weyn u farageliyeen fursadaada aad kaga qayb qaadan lahayd habka go'aan gaarista ee ku saabsan siinta ilmahaaga waxbarasho ku haboon oo bilaash ah (FAPE); ama:
3. Ay sababtay ka joojinta faa'iidooyinka waxbarashada.

Xeerka 2365.1.6.16(c); 34 CFR §300.513

Qodobka dhismaha

Midkoodna qodobbada kor lagu sheegay looma fasiri karo si looga hortago sarkaalka dhegeysiga inuu amro dugsiga degmada ama ururka kormeerka inay u hoggaansamaan Xeerka Gobolka Vermont 2365.1 illaa 2365.2.15 iyo 4313.1 illaa 4313.7 iyo qaybta ilaalinta nidaamka federaalka ee hoos timaada Qaybta B ee IDEA (34 CFR §§300.500 ilaa 300.536).

Codsiga gooniga ah ee ku aadan dacwad dhageysiga nidaam cadaaleedka

Ma jiraan wax ka mid ah qaybta ilaalinta habraaca ee qawaaniinta Federaalka ee hoos timaada Qaybta B ee IDEA (34 CFR §§300.500 ilaa 300.536) si looga hortago in aad xeraysato cabashada ku aadan nidaam cadaaladeedka oo gooni ah kaas oo ku saabsan arrin ka duwan cabashada nidaam cadaaladeedka ee marka horeba aad xareeysay.

Natiijooyinka iyo go'aanka loo soo bandhigaayo guddiga la-talinta iyo dadweynaha guud

Wakaaladda Waxbarashada ee Vermont ama dugsiga degmada ama ururka kormeerka, (midkasta oo mas'uul ka ahaa dacwad dhegeysigaaga) ka dib markii la tirtiro wixii macluumaad shakhsi ahaan lagu aqoonsan karo, waa in:

1. U gudbiyaa natiijooyinka iyo go'aamada Golaha La-talinta Waxbarashada Gaarka ah ee Vermont; iyo:
2. Waa inuu uga dhigaa natiijooyinkaas iyo go'aamadaas mid ay heli karaan dadweynaha.

Racfaan Qaadashada

Dhamaadka Go'aanka; Racfaanka; Dib u eegis Aan eexda lahayn

Xeerka 2365.1.8 34; CFR §300.514

Dhammaadka go'aanka dacwad dhegeysiga

Go'aanka laga gaaro dacwad dhageysiga nidaam cadaaladeedka (ay ku jirto dacwad dhageysiga laxiriira nidaamyada edbinta) waa kama dambays, marka laga reebo in dhinac kasta oo ku lug leh dacwad dhageysiga (adiga ama dugsiga degmada ama ururka kormeerka) ay keeni karaan dacwad madani ah, sida hoos lagu sharaxay.

Waqti Jadwaleedka iyo Habboonaanta Dacwad Dhageysiga iyo Dib u eegitaanada

Wakaalada Waxbarashada ee Vermont waa in ay xaqiijisaa in aan ka dambayn 45 maalmood ka dib marka uu dhaco 30-ka maalmood ee wakhtiga ee shirarka xalinta ama, sida lagu faahfaahiyay ciwaan-hoosaadka *waxka bedelka muddada xallinta 30-maalmood ee taariikh jadwaleedka*, in aan ka danbeyn in ka badan 45 maalmood ka dib marka uu dhacayo muddada la habeeyay, in:

1. Lagu gaadho go'aan kama dambays ah dacwad dhegeysiga; iyo:
2. In nuqul ka mid ah go'aanka loo diro mid kasta oo ka mid ah dhinacyada.

Sarkaalka dacwad dhegeysiga ayaa laga yaabaa inuu bixiyo waqti kordhin gaar ah oo ka baxsan 45-ka maalmo taariikh jadwaleedka ee kor lagu sharraxay marka ay codsadaan labada dhinacba, haddii:

1. Horusocodka waxbarasheed ee ubadka ama fayooabaanta aysan halis gelin doonin dib u dhaca;

2. Qoladu aysan heli doonin wakhti ku filan oo ay isku soo diyaariyaan kuna soo bandhigaan mawqifka kooxda/qolada marka la joogo goobta dacwad dhagaysiga si waafaqsan shuruudaha nidaam cadaaladeedka; iyo:
3. Baahida dib u dhacu ay ka weyn tahay wixii dhaqaale ama cawaaqib xumo kale ah oo ay dhici karto in dhinac uu soo gaaro haddii ay dhacdo dib u dhac.

Dacwad dhageysi kasta iyo dib u eegis kasta oo ku lug leh dooda afka waa in lagu qabtaa waqti iyo goob macquul u ah adiga iyo ilmahaaga.

Xeerka 2365.1.6.16 (a) iyo (b); 34 CFR §300.515

Tallaabooyinka Madaniga ah, oo ay ku jiraan wakhtiga lagu xareynayo Tallaabooyinkaas

Xeerka 2365.1.9; 34 CFR §300.516

Guud ahaan

Dhinac kasta (adiga ama dugsiga degmada ama ururka kormeerka) ee aan ku raacsanayn natijoooyinka iyo go'aanka ka soo baxay dacwad dhagaysiga nidaamka cadaaladeed (oo ay ku jiraan dacwad dhagaysiga la xidhiidha habraacyada anshax-marinta) waxay xaq u leeyihiin inay keenaan dacwad madani ah oo ku saabsan arrinta dhacday. mawduuca dacwad dhagaysiga nidaam cadaaladeedka. Talaabada waxaa la geyn karaa maxkamada Gobolka ee awooda u leh (maxkamad gobol oo awood u leh inay dhageysato dacwada noocaan ah) ama maxkamada degmada ee Mareykanka iyadoon loo eegin cadadka lagu muransan yahay.

Xaddidaata Waqtiga

Kooxda (adiga ama dugsiga degmada ama ururka kormeerka) ee keenaya falka/tallaabada waa in ay haystaan 90 maalmood oo taariikh jadwaleed ah laga bilaabo taariikhda uu soo baxay go'aanka sarkaalka dacwad dhagaysiga si uu u xareeyo dacwad madani ah.

Habraacyo dheeraad ah

Tallaabo/fal kasta oo madani ah, maxkamaddu:

1. Waxeey heshaa diiwaanada dacwadaha maamulka.
2. Waxeey ku dhageysata caddaynta dheeraad ah codsigaaga ama codsiga dugsiga degmadaada ama ururkaaga kormeerka; iyo:
3. Waxayna ku salaysaa go'aankeeda u kala muhiimsanaanta caddaynta waxayna bixisaa nafiska/caawimada ay maxkamaddu go'aansato inay ku habboon tahay.

Awoodda sharciyeedka maxkamadaha degmada

Maxkamadaha degmada ee Mareykanka waxay awood u leeyihiin inay go'aan ka gaaraan ficilada hoos yimaada Qeybta B ee IDEA iyo Xeerarka Waxbarashada Gaarka ah ee Vermont iyadoon loo eegin cadadka lagu muransan yahay.

Xeerka dhismaha

Ma jiro wax ku jira Qaybta B ee IDEA iyo Xeerarka Waxbarashada Gaarka ah ee Vermont oo xaddidaya ama xadeenaya xuquuqaha, nidaamyada, iyo xaq fulinta maxkamadda ee la heli karo sida hoos timaada Dastuurka Maraykanka, Sharciga Naafada Ameerikaanka ee 1990, Ciwaanka V ee Sharciga

Dhaqancelinta ee 1973 (Qaybta 504), ama Shuruucda kale ee Federaalka ee ilaalinaya xuquuqda carruurta naafada ah, marka laga reebo ka hor inta aan la xarayn ficil madani ah oo hoos imanaya sharciyadan raadinta caawinaad/nafis taas oo sidoo kale laga heli karo sida hoos imaada Qaybta B ee IDEA iyo Xeerarka Waxbarashada Gaarka ah ee Vermont, habraacyada nidaam cadaaleedka kor lagu sharaxay waa in loo isticmaalaa ilaa xad la mid ah sida looga baahan yahay haddii xisbigu xareeyo ficilka hoos imaada IDEA iyo Xeerarka Waxbarashada Gaarka ah ee Vermont. Tani waxay ka dhigan tahay in laga yaabo inaad haysato xaq fulin maxkamadeed oo la heli karo marka loo eego sharciyo kale kuwaas oo la jaan qaadaya kuwa lagu heli karo Qaybta B ee IDEA, laakiin guud ahaan, si aad u hesho caawinaad/nafis xagga sharciyada kale waa inaad marka hore isticmaashaa xaq fulinta maxkamadeed ee maamul ee la heli karo ee hoos timaada IDEA (tusaale ahaan, cabashada nidaamka cadaaladeedka, kulanka xallinta, iyo habraacyada dacwad dhageysiga eex la'aanta ah) ka hor inta aadan si toos ah maxkamadda u aadin.

Khidmadaha/Kharashaadka Qareenada

Xeerka 2365.1.10; 34 CFR §300.517

Guud ahaan

Tallaabo kasta ama dacwad kasta oo lagu keeno Qaybta B ee IDEA iyo Xeerarka Waxbarashada Gaarka ah ee Vermont, haddii aad ku adkaato, maxkamadda, iyada oo ay ka mid tahay go'aankeeda, waxay ku siin kartaa kharash macquul ah qareennada si ah qayb ka mid ah kharashyada laguugu talagalay adiga.

Tallaabo kasta ama dacwad kasta oo la keeno sida hoos timaada Qaybta B ee IDEA iyo Xeerarka Waxbarashada Gaarka ah ee Vermont, maxkamada, iyadoo ay ka mid tahay go'aankeeda, waxay ku siin kartaa kharashaad qareened macquul ah taasoo qayb ka ah kharashaadka Wakaalada Waxbarashada ee Vermont ama dugsiga degmada ama ururka kormeerka, inuu lagu bixiya kharashka qareenkaagu, haddii qareenku: (a) xareeyay cabasho ama kiis maxkamadeed oo ay maxkamaddu u aragto mid aan caqli gal ahayn, aan macquul ahayn, ama aan aasaas lahayn; ama (b) sii wado dacwadda ka dib markii dacwadu ay si cad u noqotay wax aan macquul ahayn, ama aan sal lahayn.

Ficil kasta ama dacwad kasta oo la keeno sida hoos timaada Qaybta B ee IDEA iyo Xeerarka Waxbarashada Gaarka ah ee Vermont, maxkamada, iyadoo ah go'aankeeda, waxay ku abaal marin kartaa kharash macquul ah qareenka taasoo qayb ka ah kharashaadka Wakaalada Waxbarashada ee Vermont ama dugsiga degmada ama ururka kormeerka, in la siiyo kharash adiga ama qareenkaaga, haddii codsigaaga dacwad dhageysiga nidaam cadaaladeed ama kiis dambe oo maxkamadeed lagu soo bandhigay ujeedo kasta oo aan habboonayn, sida in la dhibaateeyo, si loo sameeyo dib u dhac aan loo baahnayn, ama si aan loo baahnayn loo kordhiyo kharashka tallaabada ama dacwadda.

Abaalmarinta khidmadaha

Maxkamaddu waxay ku abaalmarisaa kharashka/khidmada qareenka ee macquulka ah sida soo socota:

1. Khidmadaha waa in lagu saleeyaa sicirrada ka jira bulshada dhexdeeda taas oo ficilka ama dacwad dhageysiga ka soo baxay nooca iyo tayada adeegyada la bixiyay. Waxaa laga yaabaa in aan la isticmaalin wax gunno ah ama tire jibaare xisaabinta khidmadaha la bixiyo.
2. Khidmadaha ayaa laga yaabaa in la bixinin sidoo kalena dib loo soo celinin kharashaadka la xidhiidha tallaabo kasta ama habraac kasta oo hoos yimaada Qaybta B ee IDEA iyo Xeerarka Waxbarashada Gaarka ah ee Vermont ee ku aadan adeegyada la qabtay ka dib bixinta heshiis qoraal ah oo adiga lagugu siinayo haddii:
 - a. Fursad soo bandhigista lagu sameeyay wakhtiga lagu sheegay Xeerka 68 ee Xeerarka Federaalka ee Habka Madaniga ah ama, xaalka sida dacwad dhageysi cadaaladeed ama

dib u eegista heer Gobolka ah, wakhti kasta in ka badan 10 maalmo taariikh jadwaleed ka hor intaan dacwadu bilaabmin;

- b. Fursad soo bandhigista laguma aqbalo 10 maalmood oo taariikh jadwaleed gudahood ah; oo:
 - c. Sarkaalka dacwad dhageysiga ee maxkamadda ama maamulku uu ogaado in caawinaad/nafiska ugu dambeyntii aad heshay aysan ahayn mid adiga kuugu habboon marka loo eego heshiis soo bandhigista. Iyadoo ay jiraan xayiraadahaas, abaal-marinta khidmadaha qareennada iyo kharashyada la xidhiidha ayaa laga yaabaa in lagu sameeyo haddii aad adkaato oo aadna si cad ugu caddaysid diidmo heshiis soo bandhigista.
3. Khidmada ayaa laga yaabaa in lagu bixinin kulan kasta oo ay yeeshaan kooxda barnaamijka waxbarashada shaqsiga ah (IEP) haddii aysan ahayn in kulanka la qabtay sabab ah dacwad maamuleed ama talaabo maxkamadeed. Khidmada ayaa laga yaabaa in lagu bixinin dhexdhexaadinta sida lagu qeexay hoosta ciwaanka *Dhexdhexaadinta*.

Kulanka xallinta, sida lagu qeexay ciwaanka Kulanka Xallinta, looma tixgalinayo shir la isugu yeero sabab ah dacwad dhageysi maamul ama tallaabo maxkamadeed awgeed, sidoo kale looma tixgeliyo dacwad dhageysiga maamul ama tallaabo maxkamadeed ujeedooyinka qodobbada khidmadaha qareennada.

Maxkamaddu waxay yaraynaysaa, sida ku habboon, qaddarka khidmadaha qareennada ee lagu bixiyo Qaybta B ee IDEA iyo Xeerarka Waxbarashada Gaarka ah ee Vermont, haddii ay maxkamaddu ogaato in:

1. Adiga, ama qareenkaada, inta ay socoto hawsha ama dacwada, si aan macquul ahayn u daahisay xalinta kama dambaysta ah ee khilaafka;
2. Qadarka khidmadaha qareennada haddii kale loo oggolaaday in lagu bixiyo si aan macquul ahayn uu ka badan qiimaha saacaddiiba ee ka dhex jira bulshada adeegyada la midka ah ee qareennada leh xirfad, sumcad, iyo waayo-aragnimo macquul ah;
3. Wakhtiga lagu bixiyay iyo adeegyada sharciga ah ee la bixiyay ahaayeen kuwo xad dhaaf ah marka loo eego nooca falka ama dacwadda; ama:
4. Qareenka ku matalaya ma uusan ku siin dugsiga degmadaada ama ururkaaga kormeerka macluumaadka ku haboon gudaha ogaysiiska codsiga nidaamka cadaaladeed ee sida lagu qeexay ciwaanka Cabashada Nidaam Cadaaladeedka.

Si kastaba ha ahaatee, maxkamaddu ma dhimi karto khidmadaha haddii maxkamaddu ay ogaato in Gobolka ama dugsiga degmada ama ururka kormeerka ay si aan macquul ahayn u daahisay xalinta kama dambaysta ah ee tallaabada ama dacwadda ama ay jirto xadgudub sida hoos imaanaya xeerarka ilaalinta nidaamka Qaybta B ee IDEA iyo Xeerarka Waxbarashada Gaarka ah ee Vermont.

Habraacyada Marka La Edbinaayo Carruurta Naafada ah

Maamulka Shaqaalaha ee Dugsiga

Xeerka 4313.1; 34 CFR §300.530

U go'aaminta kiis-ba-kiis

Shaqaalaha dugsigu waxay u eegi karaan xaalad kasta oo gaar ah kiis-kiis, marka la go'aaminayo in beddelka meelaynta, ee lagu sameeyay shuruudaha soo socda ee la xidhiidha anshaxa, ay ku habboon tahay ilmo naafo ah oo ku xadgudba xeerka dugsiga dhaqan.

Guud ahaan

Ilaa xadka ay sidoo kale u qaadaan tallaabadan oo kale carruurta aan naafada ahayn, shaqaalaha dugsigu, wax aan ka badnayn 10 maalmood oo isku xigta, waxay ka saari karaan ilmaha naafada ah ee ku xad-gudbay xeerka anshaxa ardayga meelaynta hadda ama iyada oo la geeyo goob waxbarasho oo ku meel gaadh ah oo ku meel gaadh ah (taas oo ay tahay inay go'aamiyaan kooxda barnaamijka waxbarashada gaarka ah ee ilmaha (IEP)), goob kale, ama ay ceyrin karaan ilmaha. Shaqaalaha dugsigu waxa kale oo laga yaabaa inay ku soo rogaan ka saaritaano dheeraad ah ilmaha wax aan ka badnayn toban 10 maalmood oo isku xigta isla sannad dugsiiyeedkaas dhacdooyinka kala duwan ee anshax-xumada, waa haddii ka saaristaasi aanay ka dhigan beddel ku sameynta meelaynta (eeg Bedelka Meelaynta Sabab ah Ka saaritaanada la xidhiidha Anshaxa ee qeexida, hoose).

Marka ilmaha naafada ah laga saaro meelaynta uu hadda ku jiro ee wadarta 10 maalmood oo dugsiiyeed isku mid ah sannad dugsiiyeedka, dugsiga degmadaada ama ururkaaga kormeerka waa in, maalmaha xiga ee ka saarida sannad dugsiiyeedkaas, ay bixiyaan adeegyo inta loo baahan yahay hoos ee hoos timaada cinwaan-hoosaadka Adeegyada.

Awood maamuleedka dheeraad ah

Haddii akhlaaqda ku xad-gudbay xeerka anshaxa ardaygu aanu ahayn mid muujinaya curyaannimada ubadka (ka eeg go'aanka Caddaynta, hoos) iyo beddelka edbinta meelaynta ay ka badan tahay 10 maalmood oo dugsi oo isku xigta, shaqaalaha dugsigu waxay ku dabaqi karaan nidaamka edbinta ilmahaas naafada ah si la mid ah iyo isla muddada ay siinayso carruurta aan naafada ahayn, marka laga reebo in dugsigu uu siiyo adeegyada ubadkaas sida lagu sharxay hoosta Adeegyada. Kooxda IEP ee ilmaha ayaa go'aamisa goobta waxbarasho ee ku meel gaadhka ah ee adeegyadaas camal.

Adeegyada

Adeegyada ay tahay in la siiyo ilmaha naafada ah ee laga saaray meelaynta ubadka ee haddeer ayaa lagu bixin karaa goob waxbarasho oo beddel ah oo ku meel gaadh ah.

Dugsi degmadeedka ama ururka kormeerka ayaa looga baahan yahay oo kaliya in ay u fidiyaan adeegyada ilmaha naafada ah ee laga saaray meelaynta uu hadda ku jiro 10 maalmo dugsiiyeed ah ama in ka yar sanad dugsiiyeedkaas, haddi ay siiso adeegyo ubadka aan naafo ahayn kaas oo meesha laga saaray.

Ilmaha naafada ah ee laga saaray meelaynta ilmaha ee haddeer in ka badan 10 maalmo dugsiiyeed waa inuu:

1. Sii wadaa inuu sii helo adeegyada waxbarashada, si ay awood ugu siiso ubadka in uu sii wado ka qaybqaadashada manhajka waxbarashada guud, in kasta oo uu jiro goob kale, iyo in uu horumar ka gaadho ujeedooyinka lagu dejiyay IEP-ga ubadka; iyo:
2. Helaa, sida ku habboon, qiimaynta hab-dhaqanka shaqaynaysa, iyo adeegyada faragelinta habdhaqaneed iyo wax ka beddelitaanada, kuwaas oo loo qorsheeyay in lagu wajaho ku xad-gudubka habdhaqanka si aanay mar kale u dhicin.

Ka dib marka ilmaha naafada ah laga saaro meelaynta uu hadda ku jiro 10 maalmo dugsiiyeed isla sannad dugsiiyeedkaas, iyo haddii ka saarida hadda ay tahay 10 maalmo dugsiiyeed oo isku xigta ama in ka yar iyo haddii ka saarista aysan ahayn beddelka meelaynta (hoos ka eeg qeexida), markaas shaqaalaha dugsiga, iyagoo la tashanaya ugu yaraan mid ka mid ah macalimiinta ilmaha, waxay go'aamiyaan ilaa xadka adeegyada loo baahan yahay si ilmuhu u sii wado ka qaybqaadashada manhajka waxbarashada guud, inkastoo uu ku qaadan doono goob kale, iyo si uu horusocod uga sameeyo hadafyada lagu dejiyay IEP-ga ubadka.

Haddii ka saarista ay tahay beddelka meelaynta (eeg qeexida hoose), Kooxda IEP ee ilmaha ayaa go'aamisa adeegyada ku habboon si ay ugu suurtageliso ubadku inuu sii wato ka qaybgalka manhajka waxbarashada guud, in kastoo uu ku heli doono meel kale, iyo si uu horusocod uga sameeyo hadafyada lagu dejiyay IEP-ga ubadka.

Go'aaminta muujinta

Gudaha 10 maalmood laga bilaabo go'aan kasta oo lagu bedelayo meelaynta ilmaha naafada ah sabab ah ku xadgudubka xeerka anshaxa ardayga awgeed (marka laga reebo ka saarida 10 maalmood oo isku xigta ama in ka yar oo aansan ahayn bedelida meelaynta) , dugsiga degmada ama ururka kormeerka, waalidka, iyo xubnaha ay khusayso ee Kooxda IEP (sida ay go'aamiyeen waalidka iyo dugsiga degmada ama ururka kormeerka) waa in ay dib u eegaan dhammaan macluumaadka khuseeya faylka ardayga, oo ay ku jiraan IEP-ga ubadka, indha-indheyn kasta oo dhinaca macalinka ka socota , iyo macluumaad kasta oo khuseeya oo aad siisay adiga si aad u go'aamiso:

1. Haddii anshaxa su'aasha ka taagan tahay uu sababay, ama xiriir toos ah oo la taaban karo la lahaa, curyaanimada ubadka; ama:
2. Haddii anshaxa su'aashu ay su'aasha ka taagan tahay uu ahaa natiijada tooska ah ee ka dhalatay ku guul dareysiga dugsiga degmada ama ururka kormeerka ee ku aadan fulinta IEP-ga ee ilmaha.

Haddii dugsiga degmada ama ururka kormeerka, waalidka, iyo xubnaha ay khusayso ee kooxda IEP ubadku go'aansadaan in mid ka mid ah shuruudahaas la buuxiyey, anshaxa waa in la go'aamiyaa inuu yahay muujinta naafanimada ubadka.

Haddii dugsiga degmada ama ururka kormeerka, waalidka, iyo xubnaha ay khusayso ee kooxda IEP ubadku go'aansadaan in habdhaqanka laga hadlayaa uu yahay natiijada tooska ah ee ka dhalatay ku guul dareysiga dugsiga degmada ama ururkaaga kormeerka ee ku aadan fulinta IEP-ga, dugsiga degmada ama ururkaaga kormeerka waa inay qaadaan tallaabo degdeg ah oo lagu xallinayo cilladahaas.

Go'aaminta in habdhaqankaasi ahaa muujinta naafada ee ilmaha

Haddii dugsiga degmadu ama ururka kormeerka, waalidka, iyo xubnaha ay khusayso ee Kooxda IEP ay go'aansadaan in dhaqanku ahaa muujinta naafonimada ee ilmaha, Kooxda IEP waa inay midkood:

1. Sameeyaan qiimaynta hab-dhaqaneed oo shaqaynaysa, haddii aysan ka ahayn in dugsiga degmada ama ururka kormeerka ay sameeyeen qiimayn dhaqaneed ka hor inta aanu dhaqankii ka dhashay beddelka meelaynta dhicin, oo ay u fuliyaan qorshaha faragelinta hab-dhaqanka ee ilmaha; ama
2. Haddii qorshaha faragelinta hab-dhaqanka mar hore la curiyay, dib u eeg qorshaha faragelinta dhaqanka, oo wax ka beddel, sida loogu baahdo, si wax looga qabto dhaqanka.

Marka laga reebo sida lagu sharaxay hoosta ciwaanka-hoosaadka Duruufaha gaarka ah, dugsiga degmada ama ururkaaga kormeerka waa in ay ku celiyaan ubadka meeshii laga soo saaray, haddii aysan ahayn in adiga iyo dugsiga degmada ama ururka kormeerka aad ku heshiisaan beddelka meelaynta iyada oo qayb ka ah wax ka beddelka qorshaha faragelinta hab-dhaqanka.

Duruufaha gaarka ah

Haddi anshaxa uu ahaa mid muujinaayay naafonimada ubadka iyo haddii kaleba, shaqaalaha dugsigu wey saari karaan ardayga oona ku meeleyn karaan goob waxbarashadeed kale oo ku meel gaadh ah (oo ay go'aamiyeen kooxda IEP-ga ee ilmaha) ilaa 45 maalmo dugsiiyeed, haddii ilmuhu:

1. Uu u soo qaato hub (ka eeg qeexida hoos) dugsiga ama ku haysta hub dugsiga dhexdiisa, dhismaha dugsiga, ama gudaha hawl dugsiiyeedka hoos yimaada awoodda Wakaalada Waxbarashada ee Vermont ama dugsi degmadeedka ama ururka kormeerka;
2. Isagoo og inuu haysto ama isticmaalo daroogo sharci darro ah (ka eeg qeexida hoos), ama iibiya ama dalbado iibinta walaxda la xakameeyey, (ka eeg qeexida hoos), markaad dugsiga joogto, dhismaha dugsiga, ama gudaha hawlaha dugsiga ee hoos yimaada xukunka Wakaalada waxbarashada ee Vermont ama dugsiga degmada ama ururka kormeerka; ama:
3. Uu u geystay dhaawac halis ah oo jireed (ka eeg qeexida hoos) qof kale inta uu joogo dugsiga, dhismaha dugsiga, ama gudaha hawl dugsi oo hoos timaada awoodda Wakaalada Waxbarashada ee Vermont ama dugsiga degmada ama ururka kormeerka.

Qeexitaannada

Walaxda la kantaroolo macnaheedu waa daroogo ama walax kale oo lagu aqoonsaday jadwalka I, II, III, IV, ama V ee qaybta 202(c) ee Sharciga Walxaha La kantaroolo (21 U.S.C. 812(c)).

Daroogada sharci darrada ah macnaheedu waa walax la xakameeyo; laakiin kuma jiraan walaxda la kontoroolo ee si sharci ah loo haysto ama loo isticmaalo kormeerka xirfadle daryeel-caafimaad oo shati u haysta ama si sharci ah loo haysto ama loo isticmaalo awood kasta oo kale oo hoos timaada Xeerkaas ama si hoos imaada qodob kastoo kale sharciga Federaalka ah.

Dhaawac jireed halis ah waxa uu leeyahay macnaha la siiyay ereyga "dhaawac jidheed daran" sida hoos timaada cutubka (3) ee farqada (h) ee qaybta 1365 ee ciwaanka 18, Xeerka Maraykanka.

Hub wuxuu leeyahay macnaha la siiyay ereyga "hubka khatarta ah" ee hoos yimaada cutubka (2) ee farqada koowaad (g) ee qaybta 930 ee ciwaanka 18, Xeerka Maraykanka.

Wargelinta

Maalinta ay gaadho go'aanka ka saarista taas oo ah beddelka meelaynta ubadka sabab ah ku xadgudubka xeerka anshaxa ee ardayga awgiis, dugsiga degmada ama ururka kormeerka waa in ay ogeysiyaan waalidka go'aankaas, oo ayna siiyaan waalidka ogaysiis ku saabsan ilaalinta habraaca.

Beddelida Meelaynta Sabab ah Ka saarida Anshaxa Awgeed

Ka saarida ilmaha naafada ah meelaynta waxbarasho ee ilmaha uu hadda kujiro waa beddelka meelaynta haddii:

1. Ka saaridu ay ka badan tahay 10 maalmo dugsi oo xiriir ah; ama:
2. Ilmahu uu la kulmay ka saaritaano xiriir ah oo ka dhigan qaab sababtoo ah:
 - a. Taxanaha ka saarista ay wadar ahaan ka badan yihiin 10 maalmo dugsiiyeed gudaha sanad dugsiiyeedka;
 - b. Habdhaqanka ubadku waxa uu si la mid ah ula mid yahay hab-dhaqanka ubadka ee dhacdooyinkii hore ee sababay ka saaritaanda isdaba joog ah;
 - c. Qodobbadaas dheeraadka ah sida dhererka muddo saarida kasta, wadarta wakhtiga ilmaha la saaray, iyo isku dhawaanshaha ka saaritaanda ee midba midka kale; iyo:
 - d. Haddi qaabka ka saaristu uu yahay bedelka meelaynta oo uu ku go'aamiyay xaalad-kiisba-kiis dugsiga degmada ama ururka kormeerka iyo, haddii laga horyimaado, uu ku

xiran tahay dib u eegis iyada oo loo marayo nidaamka cadaalada iyo dacwadaha garsoorka.

Xeerka 4313.7 34; CFR §300.536

Go'aaminta Goobta

Kooxda barnaamijka waxbarashada gaarka ah (IEP) waa in ay go'aamiyaan goobta waxbarasho ee ku meel gaadhka ah ee ka saaritaanda kuwaas oo ah beddelka meelaynta, iyo ka saaritaanda hoos imaada ciwaanka Awood maamuleedka dheeraadka ah iyo Daruufaha gaarka ah, ee sare.

Xeerka 4313.2 34; CFR § 300.531

Racfaan

Xeerka 4313.3; 34 CFR § 300.532

Guud ahaan

Waalidka ilmaha naafada ah waxa uu xerayn karaa cabashada nidaam cadaaladeedka (kor eeg) si uu u codsado dhagaysi dacwad cadaalad ah haddii isaga ama iyadu uu ku khilaafsan yahay ama ay ku khilaafsan tahay:

1. Go'aan kasta oo ku saabsan meelaynta lagu sameeyay sida hoos imaada qodobadan anshaxa; ama:
2. Go'aaminta muujinta ee kor lagu sharaxay.

Dugsiga degmada ama ururka kormeerka waxa laga yaabaa inay xereeystaan cabashada nidaam cadaaladeedka (eeg kor) si ay u codsadaan dacwad dhagaysiga nidaam cadaaladeedka haddi ay aaminsan yihiin sii wadista meelaynta ubadka inay si wayn dhaawac ugu keoneyso ilmaha ama ilmaha kale.

Awooda sarkaalka qaadaya dacwad dhageysiga

Sarkaalka dacwad dhageysiga ee buuxiya shuruudaha lagu sifeeyay ciwaan-hoosaadka *Sarkaalka Dhageysiga ee Eex La'aanta* ah waa in uu qabtaa nidaamka cadaaladeed oo uuna go'aan gaaro. Sarkaalka dacwad dhegeysiga waxaa laga yaabaa in:

1. Uu ku soo celi ilmaha naafada ah meelaynta laga soo saaray ilmaha, haddii sarkaalka dacwad dhegaysigu uu go'aamiyo in ka saarista ay xadgudub ku tahay shuruudaha lagu qeexay cinwaanka Awood Maamul ee Shaqaalaha Dugsiga, ama in hab-dhaqanka ilmuhu uu ahaa muujinta ilmaha naafada; ama:
2. Uu amro u beddelka meelaynta ubadka naafada ah goob waxbarasho oo ku meel gaadh ah muddo aan ka badnayn 45 maalmo dugsiiyeed haddii sarkaalka dacwad dhegaysigu go'aamiyo in sii wadista meelaynta ubadku ay aad ugu dhowdahay inay ku keento dhaawac ilmaha ama ilmaha kale.

Nidaamyadan dacwad dhegeysiga waa la soo celin karaa, haddii dugsiga degmada ama ururka kormeerku ay aaminsan yihiin in ku soo celinta ubadka meeshii asalka ahayd ay aad ugu dhowdahay inay ku keento dhaawac ilmaha ama ilmaha kale.

Mar kasta oo waalidka ama dugsiga degmada ama ururka kormeerka uu xareeysto cabashada nidaam cadaaladeedka si ay u codsadaan dacwad dhageysi degdeg ah, waa in la qabtaa dacwad dhageysi

buuxiya shuruudaha lagu sifeeyay ciwaanada *Habraacyada Cabashada Nidaam Cadaaleedka, Dacwad Dhegeysiga Cabashooyinka Nidaam Cadaaladeedka*, marka laga reebo kuwa soo socda:

1. Haddii waalidku khilaafsan yahay meelaynta ku meel gaadhka ah ama beddelka ah, ama LEA ay rumaysato in meelaynta hadda jirta ay aad ugu dhowdahay inay u keento dhaawac ubadka ama qof kale ah, Wakaaladda Waxbarasha ee Vermont waa inay diyaarisaa dacwad dhegaysi oona la dedejiyey, taas oo ay tahay ineey ku dhacdo gudaha 20 maalmood dugsiiyeed kadib taariikhda marka dacwad dhageysiga la codsado waana in lagu go'aamiyaa 10 maalmood dugsiiyeed gudahooda ka dib dacwad dhageysiga.
2. Haddii aysan ka ahayn in waalidka iyo dugsiga degmadu ama ururka kormeerku ay ku heshiiyaan qoraal inay ka tanaasulaan kulanka, ama ay ku heshiiyaan inay isticmaalaan dhaxdhexaadin, kulan xalineedku waa inuu dhacaa todoba maalmood gudahooda marka la helo ogaysiiska cabashada nidaamka cadaaladeed. Dacwad dhagaysigu wuu sii socon karaa haddii aan arrinta lagu xalin si ay labada dhinacba ku qancaan 15 maalmood gudahooda laga bilaabo maalinta la helo cabashada nidaamka cadaaladeed.

Dhinac ayaa laga yaabaa in uu racfaan ka qaato go'aanka dacwad dhagaysiga nidaam cadaaladeed ee la dedejiyay si la mid ah sida ay uga qaadan karaan go'aannada dacwadaha kale ee ah nidaam cadaaladeed (ka eeg *Racfaanada*, kor).

Meeleynta Inta Lagu Jiro Meeleynta

Marka, sida kor lagu sharaxay, waalidka ama dugsiga degmada ama ururka kormeerka ay xareeyeen dacwad nidaam cadaalad ah oo la xidhiidha arrimaha anshax-marinta, ilmuhu waa in (haddii aysan ahayn in waalidka iyo dugsiga degmadu ama ururka kormeerku ay ku heshiiyaan si kale ma'ogiyee) ku sugnaado goobta waxbarashada ee beddelka ah ee ku meel gaadhka ah iyadoo laga sugayo go'aanka sarkaalka dacwad dhegeysiga, ama ilaa uu ka dhacaayo muddada saaritaanka sida lagu sheegay laguna qeexay cinwaanka Awood Maamuleedka Shaqaalaha Dugsiga, mid kasta oo dhaca marka hore.

Xeerka 4313.4; 34 CFR §300.533

Ilaalinada loogu talagalay Carruurta Aan Wali U Qalmin Waxbarashada Gaarka ah iyo Adeegyada La Xidhiidha

Xeerka 4313.5; 34 CFR §300.534

Guud ahaan

Haddii ilmaha aan la go'aamin in uu u qalmo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha oo uu ku xad-gudbo xeerka anshaxa ardayga, laakiin dugsiga degmadu ama ururka kormeerku ay aqoon u lahaayeen (sida hoos lagu go'aamiyay) ka hor inta aanay dhicin habdhaqanka keenay falka anshax-marinta. in ilmahu uu ilmo naafo ah, markaas ilmuhu wuxuu cadeyn karaa mid ka mid ah ilaalinada lagu sifeeyay ogeysiiskan.

Gundhiga aqoonta ee loogu talagalay arrimaha anshax-marinta

Dugsiga degmada ama ururka kormeerka waa in loo arkaa in ay ogyihiin in ilmuhu yahay ilmo naafo ah haddii, ka hor inta aanay dhicin dhaqankii keenay falka anshax-marinta:

1. Waalidku uu ku muujiyay walaac qoraal ahaan in ubadku u baahan yahay waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha kormeerka ama shaqaalaha maamulka ee wakaalada waxbarashada ku haboon, ama macalinka ilmaha;
2. Waalidku uu codsaday qiimayn la xidhiidha u-qalmitaanka waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha ee hoos yimaada Qaybta B ee IDEA iyo Xeerarka Waxbarashada Gaarka ah ee Vermont; ama:
3. Macalinka ilmahu, ama shaqaalaha kale ee dugsiga degmada ama ururka kormeerka ay muujiyaan walaac gaar ah oo ku saabsan qaabka akhlaaqda ee ubadku si toos ah ugu muujiyay agaasimaha waxbarashada gaarka ah ee dugsiga degmadaada ama ururkaaga kormeerka ama shaqaalaha kale ee kormeerka ee dugsiga degmada ama ururka kormeerka.

Ka reebitaanka

Dugsiga degmada ama ururka kormeerka looma qaadan doono in uu aqoon noocaas ah leeyahay haddii:

1. Waalidka ubadku uusan u ogolaanin in ilmaha la qiimeeyo ama diiday adeegyada waxbarashada gaarka ah; ama:
2. Ilmaha la qiimeeyay oo la go'aamiyay inaanu noqon ilmo naafo ah sida hoos timaada Qaybta B ee IDEA iyo Xeerarka Waxbarashada Gaarka ah ee Vermont.

Shuruudaha khuseeya haddii aanay jirin wax gundhig aqooneed ah

Haddii ka hor inta aan la qaadin tillaabooyinka anshax-marinta ee ilmaha, dugsiga degmadu ama ururka kormeerku aanay aqoon u lahayn in ilmuhu yahay ilmo naafo ah, sida kor lagu sheegay ee hoos timaada ciwaan-hoosaadka Gundhiga aqoonta ee loogu talagalay arrimaha anshax-marinta iyo Ka reebitaanka ilmaha waxaa lagu soo rogi karaa tallaabooyinka anshax-marinta ee lagu dabaqo carruurta aan naafada ahayn ee ku kacay dhaqamo u dhigma.

Si kastaba ha ahaatee, haddii la codsado qiimaynta ilmaha inta lagu jiro muddada ilmaha lagu soo rogay tallaabooyinka anshax marinta, qiimaynta waa in loo sameeyaa si la soo dedejiyay.

Ilaa qiimaynta la dhammeeyo, ilmuhu waxa uu ku sii jirayaa meelaynta waxbarasho ee ay go'aamiyeen maamulka dugsiga, taas oo ay ku jirto ka joojinta ama ka cayrinta aan lahayn adeegyada waxbarashada.

Haddii ilmaha loo go'aamiyo inuu yahay ilmo naafo qaba, iyadoo la tixgalinayo macluumaadka qiimaynta ay sameeyeen dugsiga degmadaada ama ururkaaga kormeerka, iyo macluumaadka uu bixiyay waalidka, dugsiga degmada ama ururka kormeerka waa inay siiyaan waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha iyadoo la raacayo Qaybta B ee IDEA iyo Xeerarka Waxbarashada Gaarka ah ee Vermont, oo ay ku jiraan shuruudaha anshax-marinta ee kor lagu sharaxay.

U-gudbinta iyo Talaabada ay Qaadaysaan Sharci-fulinta iyo Masuuliyiinta Garsoorka

Qaybta B ee IDEA kama:

1. Mamnuuceyso wakaalad in ay uga warbixiso dambi uu galay ilmo naafo ah masuuliyiinta ku haboon; ama:
2. Kahortaggeyso sharci fulinta gobolka iyo mas'uuliyiinta garsoorka inay gutaan waajibaadkooda ku aaddan ku-dhaqanka sharciga federaalka iyo gobolka ee ku aadan dambiyada uu galo cunug naafo ah.

Xeerka 4313.6; 34 CFR §300.535

Gudbinta diiwaanada

Haddii dugsiga degmada ama kormeerka ay ka warbixiyaan dembi uu galay ilmo naafo, dugsiga degmada ama ururka kormeerka:

1. Waa in uu xaqiijiyaa in koobiyada waxbarashada gaarka ah ee ilmaha iyo diiwaanada anshax-marinta la soo gudbiyaa si ay u tixgaliyaan mas'uuliyiinta ay wakaaladu wargeliso dambiga; iyo:
2. In laga yaabo in ay u gudbiso koobiyada waxbarashada gaarka ah ee ilmaha iyo diiwaanada anshax-marinta kaliya ilaa inta uu ogolyahay Xeerka Xuquuqda Waxbarashada Qoyska iyo Qarsoodinimada (FERPA).

Shuruudaha Ku Meelaynta Halka Dhinac ah ee Waalidiinta Caruurta ee Dugsiyada Madaxa Banaan Iyadoo La Isticmaalayo Kharashka Dawlada

Guud ahaan

Qaybta B ee IDEA iyo Xeerarka Waxbarashada Gaarka ah ee Vermont ugama baahna dugsiga degmada ama ururka kormeerka si ay u bixiyaan kharashka waxbarashada, oo ay ku jiraan waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha, ee ilmahaada naafada ah ee dhigta dugsiga madax-banaan haddii dugsiga degmadu ama ururka kormeerku u uga dhigeen waxbarashada dadweynaha ee ku haboon ee bilaashka ah (FAPE) mid uu heli karo ilmahaaga adiguna aad doorato inaad ilmaha ku meeleyso dugsi madax banaan. Si kastaba ha ahaatee, degmada dugsiga ama ururka kormeerka ee uu ku yaalo dugsiga madaxa banaan waa in uu ku daraa ubadkaaga gudaha ardeyda kuwaas oo baahiyahooda lagu qeexay Qaybta B iyo Xeerarka Waxbarashada Gaarka ah ee Vermont ee khuseeya carruurta ay waalidkood ku meeleeeyeen dugsiga madaxa banaan sida hoos timaada 34 jir. CFR §§300.131 ilaa 300.144.

Xeerka 2368.1.4; 34 CFR §300.148

Lacag celinta meelaynta dugsiga madaxa banaan

Haddii ilmahaagu hore u helay waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha ee hoos yimaada maamulka dugsiga degmada ama ururka kormeerka, oo aad dooratid inaad ilmahaaga ku diwaangeliso dugsi hoose ama dugsi sare oo madax banaan adoono oggolaansho ka helin ama u gudbin dugsiga degmada ama ururka kormeerka, maxkamada ama sarkaalka dacwad dhageyste ah ayaa laga yaabaa inuu uga baahdo wakaaladu inay kuu soo celiso qarashka ku baxay diiwaan gelintaas haddii maxkamada ama sarkaalka dacwad dhageysigu ogaato/ogaado in wakaaladu aysan uga dhigin waxbarashada guud ee ku haboon ee bilaashka ah (FAPE) mid uu heli karo ilmahaaga waqti ku haboon ka hor diiwaangelintaas, iyo in meelaynta dugsiga madaxa bannaan ay habboon tahay. Sarkaalka dacwad dhageysiga ama maxkamada ayaa laga yaabaa inay u arkaan meeleyntaada mid haboon, xitaa haddii meeleyntu aysan gaarsiisneyn heerarka Gobolka ee khuseeya waxbarashada ay bixiso dugsiga degmada ama ururka kormeerka.

Xaddidaadda ku aadan lacag-celinta

Kharashka lacag-celinta ee lagu sharaxay cutubka sare ayaa laga yaabaa in la dhimo ama la diido haddii:

1. (a) Shirkii ugu dambeeyay ee barnaamijka waxbarashada gaarka ah (IEP) ee aad ka qaybgashay ka hor intaanad ilmahaaga ka saarin dugsiga dadweynaha, aadan ogaysiin Kooxda IEP in aad diideysay meelaynta ay soo jeediyeen dugsiga degmadaada ama ururkaaga kormeerka si ay u siiyaan FAPE ilmahaaga, oo aadan u sheegin welwelkaaga iyo ujeedadaada inaad ilmahaaga ka diwaangeliso dugsi madax-bannaan oo ay dawladduna kharashka bixineyso; ama (b) Ugu yaraan 10 maalmo shaqeed (oo ay ku jiraan fasax kasta oo dhaca maalinta shaqeedka) ka hor intaanad ilmahaaga ka saarin dugsiga dadweynaha, oo aadana siin ogeysiis qoraal ah dugsiga degmadaada ama ururkaaga kormeerka oo ku saabsan macluumaadkaas;
2. Haddii, ka hor inta aadan ilmahaaga ka saarin dugsiga dadweynaha, dugsiga degmadaada ama ururkaaga kormeerka ay ku siiyaan ogaysiis horay loo qoray, ujeeddadeeduna tahay inay qiimeeyaan ubadkaaga (oo ay ku jirto bayaanka ujeeddada qiimaynta taas oo habboonayd macquulna ahayd) , laakiin aadan ka yagleelin ilmaha mid diyaar u ah qiimaynta; ama
3. Maxkamad ayaa ogaatay in falalkaadu ahaayeen kuwo aan macquul ahayn.

Si kastaba ha ahaatee, kharashka lacag-celinta:

1. Waa in aan loo dhimin ama aan loo diidin sabab ah ku guul dareysiga ku aadan bixinta ogaysiiska haddii: (a) Dugsigu uu kaa hor istaagay inaad bixiso ogeysiiska; (b) Aadan ogaysiis ku saabsan masuuliyadaada ah inaad bixiso ogaysiiska kor lagu sharaxay (helitaanka ilaalinada habraacyadan); ama (c) U hoggaansanaanta shuruudaha sare ay u badan tahay inay u horseedi karto dhaawac jireed ku imaada ilmahaaga; iyo:
2. Maxkamadda ama sarkaalka dacwad dhegeysiyeed, ayaa qaadan kara go'aan gaarkeeda/kiisa ku aadan in aan loo dhimin ama loo diidin lacag-celinta sabab ah ku guuldareysiga in la bixiso ogeysiiskii loo baahnaa haddii: (a) Waalidku uusan ahayn mid wax akhrin kara ama uusan awoodin in uu Af-Ingiriisi wax ku qoro; ama (b) U hoggaansanaanta shuruudaha sare ay u badan tahay inay u horseedi karaan dhibaato shucuureed halis ah ilmaha.